King County

YOUR FUTURE YOUR VOICE

Qorshaha Ballaaran ee 2024
Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban
Juun 2023

Degmada King waxay cusbooneysiin tobankii-sanaba mar la sameeyo ku sameynaysaa Qorshaheeda Ballaaran,[1] kaas oo hagaya halka ay dadku ku nool yihiin, ay ka shaqeeyaan, ayna ku ciyaaraan ee Degmada King ee aan la xudduudeyn. Sida uu dhigayo Xeerka Maamulka Koboca ee Gobolka Washington,[2] Qorshuhu wuxuu hagaa siyaasadda Degmada ee 20 sano ee soo socda ee loogu talagalay adeegyada degaanka, isticmaalka dhulka, iyo xeernidaamyada horumarinta Degmada King ee aan la xudduudeyn iyo adeegyo goboleedka degmada oo dhan, sida gaadiidka, bulaacadaha, beeraha nasashada, tareennada, iyo meelaha bannaan.

Hannaanka cusbooneysiinta Qorshaha ayaa wuxuu bilowdey 2022 iyada oo lagu bilaabey abuurista Baaxadda Shaqada[3] waxaana la sii wadayaa ilaa ay ka ansaxinayaan Golaha Degmada King dhammaadka 2024 – taas oo ah sababta mashruuca loogu yaqaanno "Cusbooneysiinta 2024." Cusboonaysiinta 2024 waa dib-u-eegis ballaaran oo lagu sameynayo Qorshaha waxayna diiradda saartaa soo-jeedimada la xiriirta sinnaanta, guryeynta, iyo isbeddelka cimilada.

Kuwan soo socda waa Cusbooneysiinta 2024 ee Qabyo Qoraalka Dib-u-eegista Guud oo kooban.[4,5] Degmadu waxay codsaneysaa ra'yigaaga ku saabsan fikradahan. Faallooyinka waxaa loo soo gudbin karaa kama dambeys 15-ka Luulyo, 2023, email-kan CompPlan@kingcounty.gov ama foomka jawaabcelinta barta internet-ka publicinput.com/y8200. Fursado lagu bixinayo faallooyin hadal ah ayaa sidoo kale la heli karaa waxaanna laga heli karaa halkan www.kingcounty.gov/CompPlan.

Ra'yigaaga ku saabsan soo-jeedimadan waxaa loo isticmaali doonnaa in lagu hagaajiyo oo lagu soo gebogabeeyo Cusbooneysiinta 2024 ee ay Ku Taliyeen Golaha Fulinta Degmada King, taas oo la filayo in loo gudbiyo Golaha Degmada King bisha Disembar 2023 isaga oo la socda Bayaanka Saameynta Deegaanka ee Qabyo-qoraalka ah ee Xeerka Siyaasadda Deegaanka ee Gobolka (SEPA). Fursadaha dheeraadka ah ee ra'yiga iyo dib-u-eegista guud ee ku saabsan Cusboonaysiinta 2024 ayaa u dhici karta sida qayb ka mid ah dib-u-eegista soo-jeedimada Goloha ee 2024 oo dhan.

Arrimo dheeraad ah oo aan ku jirin soo-koobistan ayaa waxaa laga yaabaa in loo tixgeliyo sida qayb ka mid ah Cusboonaysiinta 2024, haddii ay habboon tahay oo ayna waafaqsan tahay dib-u-eegista SEPA.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Qorshaha Ballaaran iyo Cusboonaysiinta 2024 ayaa laga heli karaa www.kingcounty.gov/CompPlan.

---

[1] Qorshaha Ballaaran ee Degmada King [LINK]
[2] Xeerka Washington ee Dib-loo-eegay Cutubkiisa 36.70A [LINK]
[3] Mooshinka 16142 [LINK]
[4] Soo-koobista/qoraalka kooban ayaa loo habeeyay si waafaqsan qaabka guud ee lagu caddeeyay Baaxadda Shaqada ee la ansaxiyey. Iyada oo sabab u ah in meelaha diiradda lagu saarayo cusboonaysiinta ay yihiin kuwo ballaaran, adag, oo isku-xiran, ayaa mowduucyada baaxadda leh waxaa ku jira arrimo isku laban; Degmadu waxay isku dubarideysaa arrimaha gudaha iyada oo isdhexgalineysa falanqeynta habboon iyo soo-jeedimo si looga hortago shaqada soocan ee meelaha diiradda la saarayo.
[5] Siyaasadaha kale ee la xiriira mowduucyadan ayaa hadda ka jira Qorshaha Ballaaran. Sababta oo ah dokumentigan wuxuu diiradda saarayaa soojeedimo cusub oo lagu darayo 2024, siyaasadahaasi jira halkan laguma muujin.

Sinnaanta U-hiiliya

A. Baaxadda Mowduuca Shaqada: Yareynta barakicinta ganacsiga iyo guryeynta iyo in la horumariyo sinnaanta dadka Madowga, Asaliga ah, Dadka Midabka Leh, muhaajiriinta, iyo/ama qaxootiga, gaar ahaan kuwa sidoo kale shaqeysta wax ka yar boqolkiiba 80 ee dakhliga dhexdhexaadka ah ee degaanka.[6]

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. Taageeridda **xasilloonida guryeynta** iyo **yareynta iyo ka hortaga barakicinta degaanka** ee Degmada King ee aan la xudduudeyn iyada oo la adeegsanayo istiraatiijiyado kordhiya helidda guryo la awoodi karo oo loogu talagalay dadka taariikh ahaan aan laheyn metelaad wanaagsan kuwaas oo kala kulma midab-takoor nidaami ah ama takoorka helidda fursad guryeyn. Tusaalooyinka qaarkood ayaa waxaa ka mid ah:

    a. in la dhiirrigeliyo mashaariicda **kor-u-qaadaya xasilloonida guryeynta, ka hortaga barakaca iyo kor-u-qaadista horumarin loo dhan yahay** sida qayb ka mid ah maalgelinta guryaha la awoodi karo ee Degmada King;

    b. in la taageero mashaariicda **horumarineed ee ay bulshado-wado**, oo ay ka mid yihiin mudnaansiinta guryeynta la awoodi karo iyo maalgelinnada horumarinta bulshada;

    c. in la taageero istiraatiijiyadaha **wax looga qabanayo saameynta sinji ahaan aad u kala duwan ee** qoysaska Madowga, Asaliga, iyo Dadka Midabka Leh sida **kordhinta guri lahaanshaha** iyo taageeridda horumarinta ay bulshadu-wado;

    d. in loo baahdo ka-qaybgalka Degmada ee dedaallada gobolka ee **ilaalinta degganaha**, oo ay ku jiraan taageerada Degmada ee barnaamijyada iyo istiraatiijiyada ka hortagga guri ka-bixinta iyo bixinta gergaar kiro;

    e. Iskaashiga ay degmadu la yeelaneyso dadka kale si loo dhowro oo loo sii wanaajiyo tayada **bulshooyinka guryeynta ee laga sameeyay Degmada King ee aan la xudduudeyn**;

[6] Dakhliga reerka sannadlaha ah ee ay Waaxda Guryeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka ee Mareykanka u xisaabiso degaan kasta oo magaalo weyn ah.

f. in la taageero dib-u-adeegsiga dhismayaasha aan degaanka ahayn, sida hoteelo joogitaankooda la dheereeyay, **guryeyn taageero joogto ah leh**; iyo

g. in la abuuro **barnaamij dhiirrigelinaya guryeyn iskudhaf ah oo iskaaga ah** looguna talagalay Degmada King ee aan la xadduudeyn ee la qaabeeyay ka-dib xeernimaayada guryeynta iskudhafka khasabka iyo iskaaga ah ee dhowaan la qaatey looguna talagalay Skyway-West Hill iyo North Highline.[7] Barnaamijka wuxuu bixin doonnaa gunnooyin cufnaan iyo debecsanaan sharciyeed kale (sida kordhinta dhererka dhismeyaasha iyo yareynta shuruudaha meesha gawaarida la dhigto ee loo baahan yahay) iyada oo taasi beddelkeeda la bixinayo qaybo la awoodi karo oo goobta ah sida qayb ka mid ah degaanka qiimaha suuqa ah ama mashruuc horumarineed oo isticmaal iskudhafan leh. Barnaamijka waxaa uu khuseeyaa guryaha la deggan yahay iyo kuwa ganacsi ahaanta loo qoondeeyay ee ku yaalla magaalada Degmada King ee aan la xudduudeyn iyo Magaalooyinka Miyiga ah ee Snoqualmie Pass iyo Vashon. Barnaamijkan ayaa la cusbooneysiin doonnaa wuxuunna beddeli doonnaa Barnaamijka Dhiirrigelinta Cufnaanta Degaanka ee hadda iyo Ku-daridda Degmada Gaarka ah ee Guryeynta La Awoodi karo ee Magaalada Miyiga ee Vashon.

Ogow in “lacag-bixinta adeegsiga tashiilaadka maareynta biyaha duufaanta/fee-in-lieu” ee dhismaha guryo cusub la awoodi karo oo leh guryo qiimaha suuqa ah iyo ikhtiyaarka horumarinta goobta ka baxsan oo ka jira xeerka hadda ee goobaha khasabka ah iyo kuwa ikhtiyaariga ah ee Skyway-West Hill iyo North Highline. Degmada wuxuu qiimeynaysaa haddii barnaamijka la ballaariyey ay tahay 1) in ay gaarsiiso gunnadaasi dhammaan goobaha ikhtiyaariga ah ama 2) in lagu xaddido keliya goobaha khasabka ah ee Skyway-West Hill iyo North Highline. Iyada oo ay sababtu tahay in dib-u-eegistani ay joogto tahay, isbeddellada la soo-jeediyay lama awoodo in lagu darro Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud. Haseyeeshee, Degmadu waxay soo dhaweynaysaa ra'yiga ku saabsan arrintan si loogu saleeyo waxa lagu dari doonno Qorshaha Lagu Taliyay ee Kooban.

Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta, Wax-ka-beddellada sharciga ee Xeerka Degmada King (K.C.C.) Cutubka 21A.48, iyo Warbixinta Dulmarka Gaarka ah ee Degmada ee Guryeynta La Awoodi Karo ee Vashon. Si aad u akhriso xeer-hoosaadyada jira ee lacag-bixinta adeegsiga tashiilaadka maareynta biyaha duufaanta/fee-in-lieu: Eeg K.C.C.[8] 21A.48.080

2. Taageeridda ficillada lagu khafiifinayo loogana hortagayo **barakaca dhaqameed**, sida guryeynta la awoodi karo ee ay bulshadu-wado, ilaalinta hay'adaha dhaqanka iyo meelaha ay bulshadu isugu timaado, iyo taageeridda daryeelka carruurta ee dhaqan ahaan habboon. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

3. Taageeridda ficillada, sida degmooyinka hal-abuurka ganacsi iyo hindiseyaasha xasillinta bulshada leh, in la khafiifiyo oo laga hortago **barakaca dhaqaale ee ganacsiyada** iyo in la aqoonsado doorka ganacsiyada yaryar ee abuurista fursad loogu talagalay dadka Madowga ah, Asaliga ah, iyo Dadka Midabka Leh; muhaajiriinta iyo qaxootiga; bulshada LGBTQIA+; haweenka; iyo kooxaha kale ee taariikh ahaan metelaadda fiican lahayn. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 10aad Horumarinta Dhaqaalaha*

4. Degmada in loo baahdo in ay la shaqeyso awoodaha kale, hay'adaha, iyo la-hawlgalayaasha si loo dhiirrigeliyo **guryo kala duwan oo ay awoodi karaan dhammaan dadka heerarka kala duwan ee dakhliga** iyada oo si siman looga soo baxayo baahiyada dadka kala duwan. Kuwani waxaa ka mid ah dadka Madow, Asaliga ah, Dadka Midabka Leh, muhaajiriinta, iyo qaxootiga; kuwa sidoo kale kasbada wax ka yar boqolkiiba 80 ee dakhliga dhexdhexaadka ah ee degaanka; iyo dadka kale ee

[7] Sharciga Dowladda Hoose ee 19555 [LINK]
[8] K.C.C. [LINK]

qaybaha kala duwan, sida dadka naafada ah, waayeellada, dadka LGBTQIA+,[9] iyo haweenka. Istiraatiijiyadaha waxaa ka mid noqon kara horumarinnada ay bulshadu-wado iyo aaminaadaha dhulka, qorsheyaasha suuq-geynta sugan, iyo in ra'yi laga soo ururiyo bulshooyinkan dhaqan ahaan gaarka ah ee marxaladda horumarinta ka hor si loo xaqiijiyo guryeynta ay tahay mid habboon oo soo dhoweyn leh. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

B. Baaxadda Mowduuca Shaqada: In la dhexgaliyo qaabka guud ee siyaasadda cunsuriyad-diidka iyo sinnaan u hiilinta Qorshaha Ballaaran ee sii wanaajiyo natiijooyinka loogu talagalay kuwa Madowga ah, Asaliga ah, Dadka Midabka Leh, muhaajiriinta, iyo/ama qaxootiga, gaar ahaan kuwa sidoo kale shaqeysta wax ka yar boqolkiiba 80 ee dakhliga dhexdhexaadka ah ee degaanka.

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. In loo baahdo ficillo la beegsado, ula-kac ah, sida qaadashada hab-dhaqannada qaybinta aaggaga degaanka ee kordhiya noocyada iyo/ama cufnaanta guryeynta la oggol yahay, ee dib-u-hagaajiya waxyeellooyinka qoysaska dadka Madowga ah, Asaliga ah, iyo Dadka Midabka Leh horey ama hadda ka soo gaarey **hab-dhaqannada guryeynta iyo isticmaalka dhulka takoorka leh ama gaarka ah** ee sababey saameyn isir ahaan kala duwan (oo ay ku jiraan qaababka horumarinta, heerarka lahaanshaha oo kala duwan, maalgelin la'aanta bulshooyinka iyo helitaanka dhismeyaasha). *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubyadiisa 1aad Qorsheynta Maareynta Koboca Gobolka iyo 4aad Guryeynta iyo Lifaaqa B Guryeynta*

2. In la taageero **maalgelinnada iyo mashaariicda horumarineed ee loo siman yahay** (sida horumarinta ay bulshadu wado ee loogu talagaley guryeyn la awoodi karo, ganacsiyada degaanka, iyo xarumaha bulshada) ee goobaha ay inta badani si toos ah u saameeyeen cunsuriyadda iyo midab-takoorka qaab-dhismeedka ee halista badan ugu jira barakaca. Tani waxay gacan ka geysan doontaa sii wanaajinta helidda fursado caafimaad iyo kuwo dhaqaale oo loogu talagay dadka iyo bulshooyinka kala duwaansho weyn kala kulmaya natiijooyinka nololeed. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

3. Marka ay qiimeynayso oo ay hirgelinayso siyaasadaheeda isticmaalka dhulka, barnaamijyada, maalgashiyada, iyo habdhaqannada, ka codso Degmada in ay si firfircoon wax uga qabato arrimaha **sinnaanta, bulshada, iyo cadaaladda deegaanka; natiijooyinka caafimaadka isir iyo deegaan ahaanba kala duwan; iyo barakaca jireed, dhaqanka, iyo dhaqaale.** *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 1aad Qorsheynta Maareynta Koboca Gobolka*

4. Taageeridda **ka-qaybgalka dadweynaha hannaanada qorsheynta Degmada ee loo siman yahay** oo qaab xuddun u ah oo mudnaansiinaya dadka taariikh ahaan metelaadda fiican aan lahayn ama laga reebay hanaannada qorsheynta. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 1aad Qorsheynta Maareynta Koboca Gobolka*

5. U baahan ka-qaybgalka iyo wada-shaqeynta dadka taariikh ahaan aan lahayn metelaadda fiican si loo horumariyo horumarka ay bulshadu waddo, hirgelinta, iyo qiimeynta **barnaamijyada, siyaasadaha, iyo yoolalka guryeynta la awoodi karo ee degmada oo dhan**. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

[9] LGBTQIA+ waxaa loola jeedaa dumarka haweysta dumarka kale, ragga haweysta ragga kale, Labeebka, Laba-jinsiilaha, Asexual, Kuwo Kale (Plus). Sida ereyo la soo gaabiyey oo sii kobcaya ahaan, calaamadda kuddar waxaa ku jira dhammaan aqoonsiyada kale ee ku jira baaxadda ballaaran ee jinsiga iyo lab-iyo-dheddigga ee aanan horey loogu darin.

6. U baahan xalal cimillo oo keenaya natiijooyin loo siman yahay oo faa'iido u ah **bulshooyinka safafka hore ku jira**.[10] U baahan mudnaansiinta iyo taageeridda iskaashiyada joogtada ah ee lala yeelanayo bulshooyinka safafka hore ee wada-horumarinta iyo hirgelinta barnaamijyada, siyaasadaha, iyo qorsheynta cimillada Degmada. Waxay u baahan tahay maalgelinta iyo suuragelinta ka-qaybgalka isbeddelka cimillada ee luuqad ahaan iyo dhaqan ahaanba xaaladda la waafajiyey iyo waxbarashada bulshada ee bulshooyinka safka hore. Waxay u baahan tahay la shaqeynta la-hawlgalayaasha gobolka si loo horumariyo sinnaanta cimillada. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 5aad Deegaanka*

7. Taageer sii wanaajinta helidda dhul-beereed loogu talagalay **beeraleyda dhaqan ahaan aan adeegga fiican helin iyo/ama kuwa bulsho ahaan nugul,**[11] oo kor-u-qaad hannaanada qorsheynta beeraha degmada la xiriira si gacan looga geysto hubinta in beeruhu ay weli yihiin kuwo dhaqaale ahaan waxtar u leh dhammaan bulshooyinka beeralayda ah. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 3aad Degaamada Miyiga ah iyo Dhulalka Kheyraadka Dabiiciga ah*

8. Waxay taageertaa adeegyada gaadiidka iyo tas-hiilaadyada **si siman u bixiya adeegyada dhaqdhaqaaqa** ee loo fidiyo bulshooyinka baahida ugu badan leh, gaar ahaan dadka Madowga, Asaliga, iyo Kuwa Midabka Leh; muhaajiriinta, iyo/ama qaxootiga; iyo dadka kale ee qaybaha kala duwan. Qiimee halisaha barakaca ee ka dhalanaya adeegyada, mashaariicda, iyo barnaamijyada gaadiidka. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 8aad Gaadiidka*

9. Taageer bixinta **macluumaad dhaqan ahaan habboon ee la heli karo iyo fursado loogu talagalay ka-qaybgalka ku saabsan adeegyada**, kaabayaasha, iyo qorsheynta gaadiidka, oo ay ku jiraan loogu talagalay dadka Madowga, Asalliga ah, iyo Dadka Midabka Leh; dadka muhaajiriinta ah iyo qaxootiga; iyo dadka kale ee qaybaha kala duwan. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 8aad Gaadiidka*

10. Taageer istiraatiijiyadaha lagu wanaajinayo **fursadda dhaqaalaha ee loo siman yahay**, sida dhiirrigelinta barnaamijyada shaqaaleynta mudnaanta leh iyo xasillinta degmooyinka ganacsiga degaanka si looga hortaggo barakaca. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubka 10aad Horumarinta dhaqaalaha*

11. Sii wanaaji **isuduwidda Qabiillada Hinddida** ee ku saleysan soo-jeedimada lala diyaariyey dowladaha qabiilka Hinddida isla-markaana waafaqsan shuruudaha gobolka ee cusub; faahfaahinnada ayaa la go'aaminayaa inta la sugayo ka-qaybgalka dheeraadka ah ee qabiillada Hinddida. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud:* Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 1aad Qorsheynta Maareynta Koboca Gobolka

12. Cusboonaysiintii Qorshaha Ballaaran ee 2016, degmadu waxay ka saartey **ereyga "muwaadin"** qorshaha si looga tarjumo in Degmadu ay u adeegto dhammaan dadka deggan, iyada oo aan la eegayn xaaladda muwaadinnimo. Isbeddelo la mid ah oo lagu sameeyo xeernimaadyada

[10] Degmada King waxay ku qeexaysaa bulshooyinka safka hore in ay yihiin kuwa aan si aan isu dheellitirnayn ay u saameysay isbeddelka cimillada; kuwan waa dadka wajaha sinnaan la'aanta hadda ah iyo mid taariikhi ah, inta badanna la kulma saameynta isbeddelka cimillada ee ugu horreysa uguna ba'an waxayna leeyihiin kheyraadyo xaddidan iyo awood ay kula qabsanayaan. Kuwani waxaa ka mid ah: Bulshooyinka Madowga, Asaliga, iyo Dadka Midabka Leh ah; muhaajiriinta iyo qaxootiga; dadka ku nool dakhliyada hooseeya; bulshooyinka wajahaya halista wasakhowga aan isku dheellitirnayn; haweenka iyo shakhsiyaadka aan lab iyo dheddig toona raacsaneyn; dadka LGBTQIA+; dadka ku nool ama ka shaqeeya dibedda; kuwa leh arrimo caafimaad oo jira (sida cudurka neefta iyo cudurka wadnaha); dadka leh xirfadaha Ingiriiska ee xaddidan; haweenka uurka leh; iyo kooxaha kale ee cimillada u nugul.

[11] Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA) ayaa waxay ku qeexaysaa beeraleyda iyo xoolo-dhaqatada bulsho ahaan nugul (SDFRs) in ay yihiin kuwo ka tirsan kooxaha loo geystay isir ama sinji naceyb. SDFRs waxaa ka mid ah beeraleyda Madow ama Afrikaan Mareykan ah, Hinddida Mareykanka ama Alaskaan Dhallad ah, Hisbaanik ama Laatiin, iyo Aasiyaad ama Qof Jasiiradaha Basifiga ka soo jeeda. Qaar ka mid ah laakiinse ma ahan dhammaan barnaamijyada USDA, qaybta SDFR ayaa sidoo kale waxaa ku jira haween.

horumarinta ee Xeerka Degmada King lama sameyn waqtigaasi. Degmadu waxay dhammeystiri doontaa shaqadan iyada oo ereyga "muwaadin" ka saareyso xeernimaadiyadeeda horumarinta iyadoo ku beddelayso luuqad aad loogu dhan yahay. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Ka eeg Wax-ka-beddellada sharciga guud ahaan K.C.C.*

13. Si loo sii wanaajiyo sinnaanta hannaanka oo gacan looga geysto taageeridda natiijooyin bulsho oo loo siman yahay, Degmada King waxay abuurtey **Kooxda Shaqada Sinnaanta ee Qorshaha Ballaaran** sida qayb ka mid ah Cusboonaysiinta 2024. La kaasho Kooxda Shaqada falanqeynta xaaladaha hadda iyo diyaarinta qaab guud ee loogu talagalay falanqeynta saameynta sinnaanta ee soo-jeedimada. Ka wada-shaqeeya qaabeynta istiraatiijiyadaha guryeynta ee Cusbooneysiinta 2024. Aqoonso fursadaha lagu sii wanaajinayo qorsheynta ballaaran ee loo dhan yahay iyo ka-qaybgalka cusbooneysiinta qorshaha mustaqbalka. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Guryeynta iyo Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubka 21A.48*

C. Baaxadda Mowduuca Shaqada: Sii wanaajinta natiijooyinka sinnaanta caafimaadka ee bulshooyinka leh baahiyada ugu weyn uguna daran.

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. Waxay u baahan tahay Degmada in ay sii wanaajiso gelidda **beeraha degaanka iyo meelaha cagaaran ee Goobaha Fursadda** halka ay ka jiraan kala duwanaansho sabab u ah maalgashi yar joogto ah oo taariikhina ah.[12] Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: *Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 7aad Beeraha, Dhulka Bannaan iyo Kheyraadyada Dhaqanka*

2. Taageer helidda cunto caafimaadqab leh loo siman yahay oo la joogteyn karo si aad uga dhigto **cuntooyinka degaanka ka baxa, caafimaadka leh, ee dhaqan ahaan habboon** kuwo la heli karo oo ka tarjumaya bulshooyinka Degmada King iyo beeraleyda dhaqan ahaan la gacan bidixeeyo iyo/ama bulsho ahaan nugul (sida ay qeexday USDA). Taageer horumarinta iyo iskaashiga lala yeelanayo barnaamijyada soosaara oo qaybiya cuntooyin caafimaadqab leh oo la awoodi karo, bixiya dhiirrigelin nafaqo, isla-markaana kordhiya awoodda lagu isticmaalayo dheefaha gargaarka cuntada. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 3aad Degaamada Miyiga ah iyo Dhulalka Kheyraadka Dabiiciga ah*

3. Ku beddel **erey-bixinta "marijuana"** "xashiish," si aad gacan uga geysato faquuqa midabtakoorka iyo midka taariikhiga ah ee isticmaalka xashiishka iyo si aad u waafajiso isbeddellada dhowaan ku yimid sharciyada gobolka. Isbeddelladan farsamo ayaa lagu sameeyaya Qorshaha Ballaaran, Qorshaha Degaan-hoosaadka Vashon-Maury Island, Xeerka Degmada King, iyo Buug-khariidadeedka (Atlaska) Soonayaasha Degmada King (wax badan ka eeg hoosta qayb-hoosaadda G. "Wax-ka-beddellada Khariidadda Soonayaasha iyo Isticmaalka Dhulka Dheeraadka ah" ee Qaybta guud ee hoose). *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta, Qorshaha Degaan-hoosaadka Vashon-Maury Island Cutubka 11aad Hirgelinta, Wax-ka-beddellada sharciga ee guud ahaan K.C.C., iyo Wax-ka-beddellada Khariiddada Soonayaasha iyo Isticmaalka Dhulka*

4. Taageer ficillada xaddida xoog-saarista aan isku dheellitirnayn ee **iibka tafaariiqda iyo xayaysiinta tubaakada iyo xashiishka** ee goobaha ay boqolkiiba ay ku badan yihiin dhallinyarada iyo/ama dadka deggan ay yihiin Madow, Asali, iyo Dadka Midabka Leh. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

5. Mudnaansii maalgelinnada istiraatiijiyadaha iyo barnaamijyada ku **taageera dadka dhallinyarada ah** in ay gaaraan karaankooda, sida iyaga oo adeegsanaya barnaamij dhisaya noloshooda, tacliintooda,

[12] Meelaha Fursadda waa goobaha dadka deggan ay leeyihiin dakhli dhexdhexaad ah oo hooseeya, natiijooyin caafimaad oo liita, una jira in ka badan 0.25-mayl beer ku taalla meelo magaalooyin ah oo aan la xudduudeyn, ama u jira in ka badan 2 mayl beer ku taalla meelo miyi ah oo aan la xudduudeyn.

iyo xirfadaha nololeed. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

6. Taageer ficillada iyo maalgashiyada **dhaqan ahaan habboon iyo bixinta adeegga aadanaha iyo caafimaadka ee loo siman yahay**, sida xarumaha iyo adeegyada caafimaadka ee hab-dhaqanka. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

7. Taageer sameynta **nakhshad ay dadku-xuddun u yihiin**[13] oo ay ku jiraan mabaadii'da uu bukaanka-xuddunta u yahay, bogsasho ku jiheysan iyo daryeelka dhaawaca ee xog-ogaalka loo yahay ee ka jira xarumaha adeegyada aadanaha iyo caafimaadka gobolka ee ay Degmadu leedahay ama maalgeliso, hoyga xaaladaha degdegga ah, guryeyn taageero leh oo joogto ah ama ku-meelgaar ah, iyo guryeyn la awoodi karo. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

8. Gacan ka geyso yareynta saameynta caafimaad ee kulaylka xad-dhaafka ah ee uu ku leeyahay bulshooyinka safka hore iyo dadka nugul idinka oo la-hawlgalayaasha kala shaqeynaya hirgelinta tallaabooyinka hoos u dhigaya saameynta uu kulaylka xad-dhaafka ah ku leeyahay bulshooyinka safka hore iyo xaafadaha taariikh ahaan helin adeeg ku filan kuwaas oo aan ka bixin geedo badan lehna dhul bannaan, sida iyada oo la maalgelinaya kaabayaasha cagaarka ah iyo taageeridda isticmaalka hababka qaboojinta dadban iyo tiknoolajiyadaha qaboojinta ee tamarka hufan. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 2aad Bulshooyinka Magaalooyinka*

[13] Nakhshadda ay dadku-xuddunta u yihiin waxay awood u leeyihiin dhisidda adkeysiga shakhsiga iyo/ama bulshooyinka, khafiifinta dhaawaca hore, ka hortagga waxyeello dheeraad ah, iyo kor-u-qaadista bogsashada, gaar ahaan marka la sameeyo iyada oo lala tashanayo kuwa dareemaya firaaqada. Nakhshadaasi waxaa ku jira cunsurro taageera ammaanka jireed, nafsaani, iyo mid dareen, sida: gelidda dabeecadda, jid raadin cad, marinno ballaaran, jaran-jarro furan oo iftiin leh, xariiqa-aragga oo cad, yareynta qaylada, iftiin debecsan, midabyo rinji oo qofka dejinaya, deyrar dibedda ah, ka tarjumidda iyo sharfidda dhaqanka, iyo meelo bannaan diirrimaad iyo soo dhaweyn leh iyo goobo ay bulshadu wadaagto.

Guryeyn

A. Baaxadda Mowduuca Shaqada: Cusbooneysiinta iyo dib-u-eegista siyaasadda guryeynta ee ballaaran.

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. Kuddar shuruudaha Hindiso-sharciyeedka Aqalka 1220,[14] oo ay ku jiraan siyaasaaha wax ka qabanaya **baahiyada guryeynta iyo saameynta isir ahaaneed ee kala duwan**. Faahfaahin dheeraad ah ka eeg qayb-hoosaadda Guryeynta B. ee hoose iyo qaybta kore ee Sinnaan U-hiilinta. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta, Lifaaqa B Guryeynta, iyo Wax-ka-beddellada sharciga ee Xeerka Degmada King (K.C.C.) Cutubyada 21A.06, 21A.08, 21A.12, 21A.18, 21A.24, 21A.32, 21A.43, iyo 21A.48*

2. Qaado **Qiimeynta Baahiyada Guryeynta ee Degmada King**. Qiimeynta waxaa lagu oggaadey in uu jiro awood sooneyn dad ku filan oo loogu talagalay guryeynta loo heli karo dhammaan qaybaha dakhliga ee Degmada King ee aan la xudduudeyn marka laga reebo guryeynta xaaladaha degdegga ah. Isbeddello xeer ayaa la soo-jeediyay oo si cad u oggolaanaya **guryeynta xaaladaha degdegga ah** (sida hoyga xaaladaha degdegga ah, tuullooyin yaryar, iyo noocyada kale ee guryeynta xaaladaha degdegga ah) oo ka jira degaanka aan la xudduudeyn ee magaalada ee CB (Ganacsiga Bulshada), RB (Ganacsiga Gobolka), O (Xafiiska), R-12 (Degaamada Magaalooyinka, 12 guri eykar kasta), R-18 (Degaamada Magaalooyinka, 18 guri eykar kasta), R-24 (Degaamada Magaalooyinka, 12 guri eykar kasta), iyo R-48 (Degaamada Magaalooyinka, 12 guri eykar kasta) soonayaasha, ku xiran shuruudo, si loo abuuro awoodda wax looga qabanayo yaraanshaha. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Lifaaqa B ee Qorshaha Ballaaran iyo Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubyada 20.20, 21A.06, 21A.08, iyo 21A.18*

3. Siyaasadaha waafaji **istiraatiijiyadaha guryeynta hadda, hab-dhaqannada, iyo kheyraadyada** iyo **mudnaanaha iyo tilmaamaha maalgelinta guryaha gobolka**. Faahfaahin dheeraad ah ka eeg qayb-hoosaadda B. ee hoose iyo qaybta kore ee Sinnaan U-hiilinta. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

[14] Beddelka Labaad ee Hindiso-Sharciyeedka 1220 ee La Dhammeystiray [LINK]

4. Cusbooneysii **heerarka dakhliga guryeynta la awoodi karo** ee Qorshaha si aad u adeegsato erey-bixinta awoodista joogtada ah iyo jaangooyada. Caddeynta kooxaha dakhliga guryeynta waxay kordhin doontaa daahfurnaanta dhiirrigelinnada iyo qaybinta kheyraadka ee gudaha mashaariicda guryeynta ee Degmada King. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

B. Baaxadda Mowduuca Shaqada: Sii-wanaaji sahayda guryeynta la awoodi karo, gaar ahaan loogu talagalay kuwa Madowga ah, Asaliga ah, Dadka Midabka Leh, muhaajiriinta, iyo/ama qaxootiga eena kasbada wax ka yar boqolkiiba 80 ee dakhliga dhexdhexaadka ah ee degaanka.

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. U baaho korjoogteynta horumarka laga gaarey dhanka ka soo bixidda **bartilmaameedyada guryeynta degmada oo dhan, baahiyada guryeynta la awoodi karo ee degmada oo dhan, iyo baabbi'inta kala duwanaanshaha ka jira helidda** dookha guryeynta iyo xaafadda. U baaho cusbooneysiinta istiraatiijiyadaha Degmada King iyo degmada oo dhan marka aysan keenayn guryeyn la awoodi karo oo dad ku filan si looga soo baaxdo baahida degmada oo dhan. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

2. Iyada oo loo marayo Golaha Qorsheynta Maareynta Koboca (GMPC),[15] u baaha qorsheynta gobolka, isuduwidda, iyo isla-xisaabtanka ee taageerada **dedaallada guryeynta la awoodi karo ee ka jira degmada**, oo ay ku jiraan ficillada ku wajahan iyo korjoogteynta hirgelinta warbixinta Koox Hawleedka Guryeynta La Awoodi Karo ee Gobolka.[16] Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: *Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

3. Mudnaansii la shaqeynta awoodaha kale, hay'adaha, iyo la-hawlgalayaasa si ay u taageeraan **qaybinta loo siman yahay ee guryeynta la awoodi kari iyo adeegyada taageerada leh** ee degmada oo dhan sida lagu muujiyey Qorshaha Istiraatiijiga ah ee Cadaaladda Bulshada iyo Sinnaanta Degmada; Qorshaha Hirgelinta Bilowga Wanaagsan ee Carruurta (Best Starts for Kids); Qorshaha Hirgelinta Caafimaadka Loo Marayo Guryeynta; Qorshaha Hirgelinta Lacagaha Loo Ururiyo Adeegyada Aadanaha iyo Dadka Waaweyn, Halyeydii Hore; Qorshaha Sanduuqa Canshuurta Iibka Caafimaadka Habdhaqanka Daroogo Ku-tiirsanaanta iyo Jirrada Dhimirka; iyo qorsheyaasha kale ee hirgelinta ee la xiriira adeegyada aadanaha iyo guryeynta. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

4. Barnaamijyada kaaba guryeynta la awoodi karo ee ay Degmadu maalgeliso, **mashaariicda guryeynta la awoodi karo** ee u adeegga shakhsiyaadka iyo reeraha dakhligoodu le'eg yahay ama ka hooseeyo boqolkiiba 50 dakhliga dhexdhexaadka ah ee degaanka ee loogu talagalay mashaaricida kirada, le'eg yahay ama ka hooseeyo boqolkiiba 80 dakhliga dhexdhexaadka ah ee degaanka ee loogu talagalay mashaariicda guri lahaanshaha, iyo/ama meelaha uu gabaabsi ba'an uu ka jiro guryeynta la awoodi karo. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

5. Dhiirrigeli istiraatiijiyadaha maalgelinta iyo isticmaalka dhulka gobola ee taageera **horumarinnada magaalada ee isticmaalka-iskudhafka ah iyo dakhliga iskudhafka ah** sida hab lagu caawinayo xaafadaha isir ahaan iyo dhaqaale ahaanba isku dhexjirka ah, lagu kordhinayo doorashooyinka gaadiidka iyo guryeynta Degmada King oo dhan, iyo sii wanaajinta xassiloonida guryeynta ee dadka dakhliyada oo dhan. Tani waxaa ka mid ah istiraatiijiyadaha isticmaalka dhulka sida guryeynta dhexe

[15] Hay'ad dejisa siyaasadda gobolka oo dhan oo u baahan Xeerka Maareynta Koboca, kana kooban madaxda laga soo doortey Degmada King, Seattle, Bellevue, iyo magaalooyinka kale ee ku yaalla Degmada King, degmooyinka ujeeddada gaarka ah loo sameeyay, iyo Dekedda Seattle. [LINK] GMPC ayaa la-soconaya Siyaasadaha Qorsheynta Degmada oo Dhan ee Degmada King. [LINK]

[16] Soo-jeedimada iyo Warbixinta Kama-Dambeysta ah ee Koox Hawleedka Guryeynta La Awoodi Karo ee Gobolka ee la waafajiyey Mooshinka 15372

iyo guryeynta loo dhan yahay, horumarinta gaadiidka ku jiheysan, iyo guryeynta la awoodi karo ee u adeega dakhliyo kala duwan oo ka hooseeya boqolkiiba 80 ee dakhliga dhexe ee goobta. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

6. Taageer horumarinta **guryeynta la awoodi karo ee cimillada u adkeysta** ee guud ahaan ficillada iyo istiraatiijiyadaha guryeynta degaanka iyo gobolka ee Degmada, sida mudnaansiinta in kaalmooyinka lagu abaalmariyo mashaariicda guryeynta la awoodi karo ee cimillada u adkeysta iyo u qareemeynta dhiirrigelinta taageerta hab-dhaqannada cimillada u adkeysta ee jaangooyada dhisidda cagaarka ee gobolka oo dhan ee loogu talagalay guryeynta la awoodi karo. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

7. In la yareeyo halisaha barakaca iyo in la taageero horumarinta guryeynta la awoodi karo oo dheeraad ah, in la abuuro **barnaamijka dhiirrigelinta guryeynta loo dhan yahay ee ikhtiyaariga ah ee aan la xudduudeyn** ee loogu talagalay goobaha ganacsiga iyo kuwa la dego. Ka eeg faahfaahinno dheeraad ah qaybta Sinnaan U-hiilinta ee kore. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta, iyo Wax-ka-beddellada sharciga ee Xeerka Degmada King (K.C.C.) Cutubka 21A.48*

8. Ka noqo **Ku-daridda Degmada Gaarka ah ee Guryeynta La Awoodi karo ee Magaalada Miyiga ee Vashon**, iyo in taa beddelkeeda lagu tiirsado barnaamijka guryeynta loo dhan yahay ee cusub ee looga hadley qaybta Sinnaan U-hiillinta ee kor ku xusan. Ku-daridda laguma guuleysan in ay soosaarto wax guryo la awoodi karo ah, iyo barnaamijka guryeynta ee loo dhan yahay ayaa la filayaa in si taabogal ah loo taageero helidda guryeynta la awoodi karo oo la wanaajiyey oo loogu talagalay Ku-daridda. Qorshaha Degaan-hoosaadka Vashon-Maury Island ayaa sidoo kale wax laga beddelay si loogu muujiyo isbeddelkan loona waafajiyo barnaamijka guryeynta ee loo dhan yahay. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Degaan-hoosaadka Vashon-Maury Island Cutubkiisa 6aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta, iyo Wax-ka-beddellada sharciga ee Xeerka Degmada King (K.C.C.) Cutubyada 21A.34 iyo 21A.48, Isticmaalka Dhulka iyo Wax-ka-beddellada Khariidada Soonayaasha, iyo Warbixinta Dulmarka Gaarka ah ee Degmada ee Guryeynta La Awoodi Karo ee Vashon*

9. In looga baahdo Degmada in ay la shaqeyso awoodaha kale, hay'adaha, iyo la-hawlgalayaasha si loo dhiirrigeliyo **guryo kala duwan oo ay awoodi karaan dhammaan dadka heerarka dakhliga oo si siman looga soo baxayo baahiyada dadka kala duwan.** Ka eeg faahfaahinno dheeraad ah qaybta Sinnaan U-hiilinta ee kore. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta, Lifaaqa B Guryeynta, iyo Wax-ka-beddellada sharciga ee Xeerka Degmada King (K.C.C.) Cutubyada 21A.06, 21A.08, 21A.12, 21A.18, 21A.24, 21A.32, 21A.43, iyo 21A.48*

C. Baaxadda Mowduuca Shaqada: Ballaari ikhtiyaarada guryeynta.

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. Dhiirrigeli horumarinta guryeynta la awoodi karo oo cusub oo ay ku jiraan guryo afar-, saddex-, laba-qol ah oo dad ku filan si loo haqabtiro baahiyada boos ee reeraha la filayo iyo si **kor loogu qaado ikhtiyaarada guryeynta dhaqan ahaan habboon**. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 4aad Adeegyada Aadanaha iyo Guryeynta*

2. Ballaari ikhtiyaarada guryeynta adiga oo kordhinaya saddex nooc oo ah gureynta loo oggol yahay soonayaasha magaalada ee cufnaantoodu hooseysa si loo taageero horumarinta **guryeynta dhexe**, taas oo caadi ahaan awood loo awoodi karo marka loo eego guryaha kaligooda taagan ee caadiga ah. U oggolow in laga dhiso guryo u qaybsan laba-dabaq, saddex-dabaq, iyo afar-dabaq oo ay degi karaan qoysas badan dhammaan soonayaasha la deggan yahay ee ku yaalla Degmada King ee aan la xudduudeyn. Ku xaddid dhererka dhismeyaasha ilaa 35 cagood soonayaasha cufkoodu hooseeyo, si loo taageero horumarin la jaanqaadi karto xaafadaha jira. Hagaaji ballacyada ugu yar iyo kuwa ugu badan ee lootada si baaxadda dhismayaasha loo yareeyo si loo taageero qaybo badan iyo

awoodid la sii wanaajin karo. Yaree shuruudaha muuqaal-dhuleedka iyo madadaalada goobta, iyo yaree shuruudaha meelaha gawaarida la dhigto, si loo dhiirrigeliyo horumarinta noocyada guryeynta dhexe oo loo sii wanaajiyo awoodista. U oggolow abaarmennada dabaqa ah (afar dabaq iyo wax ka badan) soonayaasha cufnaantoodu hooseyso haddii ay goobto saamaxeyso. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg C Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubyada 21A.06, 21A.08, 21A.12, 21A.18, 21A.24, 21A.32, 21A.43, iyo 21A.48 iyo Warbixinta Guryeynta Dhexe*

3. Golaha Sharci-dejinta Gobolka Washington waxay ansixiyeen xeer-hoosaadyo cusub oo loogu talagalay **qaybo guryo dheeraad ah** (ADUs) oo laga hirgelinayo magaalooyinka intii lagu guda jirey kulanka sharci-dejinta 2023. Sida qayb ka mid ah cusboonaysiinta 2024, Degmadu waxay dib-u-eegaysaa Xeerka Degmada King si ay u xaqiijiso waafaqsanaanta shuruudahaasi cusub. Iyadoo ay sababtu tahay waqtiga tallaabada ay dhowaan dowladdu qaadey, isbeddellada la soo-jeediyay lama awoodo in lagu darro Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud. Haseyeeshee, Degmadu waxay soo dhaweynaysaa ra'yiga ku saabsan xeer-hoosaadyada ADU ee magaalada ee dhowaan si loogu saleeyo waxa lagu dari doonno Qorshaha Lagu Taliyay ee Kooban. *Si aad u akhriso xeer-hoosaadyada ADU ee jira: Eeg K.C.C. 21A.08.080.B.7.a.*

Isbeddelka Cimillada iyo Deegaanka

A. Baaxadda Mowduuca Shaqada: Waafajinta iyo horumarinta Qorshe Hawleedka Istiraatiijiga ah ee Cimilada 2020 ee Degmada King[17] si loo yareeyo qiiqa ka soo baxa guryaha loo dhiso dhirta (greenhouse), loo taageero bulshooyin adkeysi leh oo la joogteyn karo, si loogu diyaar-garoobo isbeddelka cimillada.

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. Abuur **Mabda'a Hagaya isbeddelka cimillada** ee Qorshaha Ballaaran oo cususb iyo jiheynta siyaasadda la xiriirta taas oo kor-u-qaadeysa isla-markaana hormarineysa sida ay Degmadu uga go'an tahay in ay yareyso qiiqa ka soo baxa guryaha loo dhiso dhirta (greenhouse), harumarinta sinnaanta cimillada, iyo u diyaar-garowga saameynta isbeddelka cimillada oo la jaanqaadaya Qorshe Hawleedka Istiraatiijiga ah ee Cimillada. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 1aad Qorsheynta Maareynta Koboca Gobolka*

2. U baaho xallalka cimillada ee keenaya natiijooyin loo siman yahay oo faa'iido u leh **bulshooyinka safafka hore ku jira**; ka eeg faahfaahinno dheeraad ah qaybta Sinnaan U-hiilinta ee kore. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 5aad Deegaanka*

3. Cusbooneysii **bartilmaameedyada yareynta qiiqa ka soo baxa guryaha dhirta loo dhiso (greenhouse)** si ay ula jaanqaadaan kuwa Siyaasadaha Qorsheynta Degmada oo Dhan iyo Qorshe Hawleedka Istiraatiijiga ah ee Cimillada ee Degmada King. U baaho Degmada King in ay si joogto ah u qiimeyso ugana warbixiso qiiqa ka soo baxa guryaha dhirta loo dhiso (greenhouse) ee degmada oo dhan. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 5aad Deegaanka*

4. U baaho barnaamijyada iyo xeernidaamyada horumarinta Degmada si aad u yareyso isticmaalka tamarta, u kordhiso isticmaalka tamarta la cusbooneysiin karo, iyo si aad u **ciribtirto isticmaalka shidaalka** lagu adeegsado deegaanka la dhisey. U baaho barnaamijyada Degmada in ay mudnaansiiyaan helidda iyo awoodista bulshooyinka safka hore. Dhiirrigeli adeegyada tamarta si loo bixiyo istiraatiijiyadaha yareynta shidaalka iyo si loo taageero isbeddellada nidaamiga ah ee fududeeya kala-guurkan. Deji yoolalka yareynta isticmaalka shidaalka ee hawlgallada Degmada una

[17] Qorshe Hawleedka Istiraatiijiga ah ee Cimillada 2020 ee Degmada King [LINK]

baaho qorsheyaal hawleedka lagu ciribtirayo shidaalka ee aqoonsanaya istiraatiijiyadaha isticmaalka shidaalka loogu beddelayo ilo koronto oo dib loo cusbooneysiin karo. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 5aad Deegaanka*

5. Taageer ficillada, sida kordhinta diiwaangelinta iyo isticmaalka miteyn ee lagu adeegsado xarumaha lagu daaweeyo biyaha wasakhda ah iyo meelaha qashinka lagu qubo oo ay iska leedahay Degmada King, kuwaas oo meesha ka saara caqabadaha iyo badinta isticmaalka **gaaska dabiiciga ah ee la cusbooneysiin karo** si loo yareeyo ku tiirsanaanta shidaallada qiiqa kaarboonta soosaara ee guryaha loo dhiso dhirta (greenhouse). *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 9aad Adeegyada, Tashiilaadyada iyo Yutiiliska*

6. Dhexgeli tixgelinta saameynta cadaaladda sinnaanta iyo cadaaladda bulshada ee gundhiga **tiknoolajiyadaha tamarta dib-loo-cusbooneysiin karo**. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 9aad Adeegyada, Tashiilaadyada iyo Yutiiliska*

7. Kor-u-qaad maalgelinta **horumarinta ku jiheysan gaadiidka oo loo siman yahay** si ay gacan uga geysato yareynta qiiqa ka yimaada waaxda gaadiidka. Tani waxaa ka mid ah mudnaansiinta guryeyn ay awoodi karaan kuwa kasbanaya dakhliga ka yar boqolkiiba 80 ee dakhliga dhexdhexaadka ah ee degaanka ee horumarinta ku jiheysan goobaha gaadiidka ee guryaha Metro-ga Degmada King. Waxaa sidoo kale ka mid ah tixgelinta isticmaalka dhulka, guryeyn loo dhan yahay, tallaabooyin ka hortagga barakaca, iyo sifooyin bulsho marka la qorsheynayo maalgelinnada nidaamka gaadiidka basaska ah. Waxayna taageeraysaa la-hawlgalidda maalgeliyeyaasha guryeynta la awoodi karo ee gobolka si loogu waafajiyo kheyraadka horumarinta yoolalka horumarinta guryaha ee gobolka. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 8aad Gaadiidka*

8. Taageer ballaarinta isticmaalka **gaadiidka korontada ku shaqeeya** ee gaarka loo leeyahay, oo ay ku jiraan fursadaha lagu sii wanaajinayo helidda loo siman yahay ee macluumaadka gaadiidka korontada ku shaqeeya, dhiirrigelin maaliyadeed, iyo kaabayaasha danabeynta/dabeynta. Tani waxaa ka mid noqon kara: in luuqado badan lagu bixiyo macluumaadka ku saabsan lahaanshaha gaadiidka elektarooniga ah, taageeridda barnaamijyada baabuur-wadaaga elektarooniga ah ee ka jira bulshooyinka aan helin adeegga ku filan, iyo taageeridda kordhinta qiimo-dhimista federaalka ama gobolka ee loogu talagalay qoysaska dakhligooda hooseeyo marka ay iibsanayaan ama kireysanayaan gawaari elektaroonig ah. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 8aad Gaadiidka*

9. Uga baaho Degmada in ay qaado tallaabooyin si ay u qorsheysato ama u yareyso **saameynta dabka keymaha** ee ka kaca meelaha ay iska galaan dhulka duurka ah-magaalada ee Degmada King ee aan la xudduudeyn. Dhiirrigeli magaalooyinka ku yaalla meesha ay iska galaan dhulka duurka ah-magaalada in ay sameeyaan qorsheynta iyo qiimeynta halista dab keymaha. Taageer ficillada lagu sii wanaajinayo caafimaadka keymaha iyo adkeysiga dabka keymaha ee dhulalka keymaha. Wax-ka-beddel xeernidaamyada geed-qaadista iyo simista dhulka kala sarreeya si loo saamaxo maareynta dhirta oo wanaagsan iyo si loo yareeyo halista dabka keymaha ee u dhow dhismayaasha la deggan yahay iyo fiilooyinka korontada xambaara ee ku dhow dhulka loogu talagalay waddooyinka ee degmada. Kala shaqee la-hawlgalaasha gobolka in la yareeyo halisaha qar-jabka buuraha iyo daadka ee ka dhalanaya waxyeellada dabka keymaha iyo sameynta la xiriirta. Taageer ficillada yareeya saameynta caafimaadka ee qiiqa dabka keymaha. Taageer tallaabooyinka loogu talagalay waxbarashada dabka keymaha ee bulshada iyo u-diyaar-garowga. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubyadiisa 3aad Degaamada Miyiga ah iyo Dhulalka Kheyraadka Dabiiciga ah iyo 5aad Deegaanka*

10. Taageer ficillada iyo barnaamijyada bulshooyinka safka hore u suurageliya horumarinta xirfadda iyo helidda **shaqooyinka cagaaran ee mushaar ku filan nolol-maalmeedka laga helo**, sida kordhinta shaqaaleysiinta Degmada ee lagu helayo adeegyada horseedaya xirfadaha iyo shaqooyinka cagaaran. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 10aad Horumarinta Dhaqaalaha*

11. Taageer ficillada iyo barnaamijyada kordhiya ka hortagga wasakhda, dib-u-adeegsiga, dib-u-warshadeynta, iyo qoosheynta, si loo sii wanaajiyo ilaalinta kheyraadka, gacanna ka geysta gaarista yoolka **kheyraadyada qashin la'aanta** ee kharash ahaan taabogalka ah,. Tallaabooyinka waxaa ka mid noqon kara taageeridda tiknoolajiyadaha hal-abuurka leh ee dib u heli kara agabka waxtarka badan leh iyo qaadashada xeernidaamyo ka dhiga ka hortagga wasakhda iyo dib-u-warshadeyntaba mid fudud in la sameeyo. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 9aad Adeegyada, Tashiilaadyada iyo Yutiiliska*

B. Baaxadda Mowduuca Shaqada: Dhexgeli oo hirgeli yoolalka Biyo Nadiif ah, Sabo Caafimaadqab leh.

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. Xoojinta shuruudaha loogu talagalay horumarinta xariiq badeedka/dhulka badda xiga waa in la oggaadaa oo la nakhshadeeyaa si looga fogaado in loo baahdo mustaqbalka **xasillinta xariiqa badda ama dhulka badda xiga** inta uu dhismuhu jiro, taas oo waafaqsan isbeddellada sharciyada heerka gobolka iyo hab-dhaqannada hadda jira. Oggolow xassilinta dhismeyaasha xariiqa badda oo cusub ama beddel ah keliya marka warbixinta jiyootiknikada ah ay xaqiijiso baahida dareensan waqtiga ee xasillinta loogu talagalay. Xaaladahaasi oo kale, waxaad marka hore u baahanaysaa isticmaalka tallaabooyinka xasillinta xariiqa badda oo aan dhismo ahayn, marka xigta xasillinta xariiqa badda oo dhisme jilicsan ah haddii xallal aan dhisme ahayn aysan macquul ahayn; xasillinta dhismaha adag ee beddelka ah ama cusub (oo ay ku jiraan qob-qoyo) ayaa keliya lagu oggolaan doonnaa xaalado xaddidan. Dhiirrigeli horumarinta xariiqa badda in dib loo dhigo oo laga soo bilaabo dagaandaga dheer iyo khataraha nabaadguurka si loo ilaaliyo inta horumarinta la sameynayo ay jirto, keliya ma ahan waqtiga dhismaha. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 6aad Xariiq-badeedyada iyo Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubka 21A.24*

2. Si loo sii **ilaaliyo tayada deegaanka iyo shaqooyinka ikoloji ee muhiimka ah**, taageer hirgelinta barnaamijka dib u soo nooleynta marinka kalluunka ee Degmada, Dedaalka Ilaalinta Dhulka,[18] iyo qorshaha istiraatiijiga ah ee Biyaha Nadiifka ah iyo Sabo Caafimaadqab leh.[19] Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: *Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 5aad Deegaanka*

3. Taageer dib-u-nooleynta iyo wanaajinta keydka daadka, qaadista biyaha daadka, iyo shaqooyinka ikoloji ee loo marayo **tallaabooyinka maareynta dhulka daadka ku soo rogmada ee leh faa'iidooyinka badan**, beddelkii hal natiijo. Faa'iidooyinka kale ee ay leeyihiin mashaariicda yareynta halista daadka waxaa ka mid ah u-adkeysiga isbeddelka cimilada, joogteynta yoolalka cadaaladda bulshada iyo sinnaanta ee Degmada King, sii wanaajinta sabada, helidda madadaalo ballaaran, ama sii wanaajinta in la suurageliyo dhulka u dhow in loo isticmaal kayn ama beerasho. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 5aad Deegaanka*

4. Dib-u-eeg oo cusbooneysii **xeernidaamyada meelaha muhiimka ah**, iyada oo la isticmaalaya sayniska ugu fiican ee la heli karo, sida: ka tarjumidda shuruudaha khasaare saafi ah la'aanta ee sharciga gobolka iyo cusbooneysiinta xeernidaamyada la xiriira dhulka qooyan, goobaha jiyoloji ahaan khatarta ah, goobaha ilaalinta sabada duurjoogta iyo kalluunka, iyo goobaha dib-u-buuxinta biyaha dhulka ee muhiimka ah. Shaqadan waa shaqo joogto ah; sidaa daraadeed, isbeddellada la soo-jeediyay lama awoodo in lagu daro Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud. Haseyeeshee, Degmadu waxay soo dhaweynaysaa ra'yiga ku saabsan xeer-hoosaadyada hadda si loogu saleeyo waxa lagu dari doonno Qorshaha Lagu Taliyay ee Kooban. *Si aad u akhriso xeernidaamyada degaanka muhiimka ah ee jira: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 5aad Deegaanka iyo K.C.C. Cutubka 21A.24*

5. Wax-ka-beddel koodhka Meelaha Muhiimka ah iyo koodhka Geed-qaadista iyo simista dhulka kala sarreeya si loo oggolaado **maareynta biyo-xireennada ey-biyoodka ku nool**. Tani waxay oggolaan

[18] Dedaalka Ilaalinta Dhulka ee Degmada King [LINK]
[19] Biyaha Nadiifka ah iyo Sabada Caafimaadqabka leh ee Degmada King [LINK]

doontaa tallaabooyin lagu yareynayo ama lagu khafiifinayo saameynta ama khataraha ay leeyihiin biyo-xireennada ey-biyoodka ku nool, oo ay ku jiraan laakiinse aan ku xaddidnayn in la baabi'iyo qayb ama dhammaan biyo-xireennada ey-biyoodka ku nool; rakibaadda, dayactirka, hagaajinta, beddelka, iyo bixinta aaladaha biyo-xireenka ey-biyoodka; iyo soo bixinta ulaha iyo burburka kale ee isugu soo ururey aaladaha biyo-xireenka ey-biyoodka ku nool. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubyada 16.82 iyo 21A.24*

6. Taageer tallaabooyinka loogu talagalay wada-shaqeynta gobolka ee ku saabsan qorsheynta, xeernidaamyada, maalgelinta **maareynta biyaha-duufaanta** si mudnaan loo siiyo horumarinnada nidaamka biyaha-duufaanta ee gobolka taas oo kharash ahaan taabogal ah iyada oo dheefaha ay u leeyihiin bulshooyinka iyo deegaanka ay aad u badan yihiin, iyada oo aan la eegayn xudduudaha maamul. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubyadiisa 5aad Deegaanka iyo 9aad Adeegyada, Tashiilaadyada iyo Yutiiliska*

C. Baaxadda Mowduuca Shaqada: Kordhi ilaalinta dhulka.

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. GMPC ayaa hadda tixgelinaysa in ay isbeddelo macquul ah ku sameyso **barnaamijka Afar-ilaa-Hal**. Qaar ka mid ah isbeddellada la qiimeynayo waxaa ka mid ah haddii la oggolaanayo: yareynta meelaha bannaan ee loogu talagalay dhulalka qiimaha ikolojiga sarreeya leh, xarumaha laga hirgelinayo degaamada miyiga ah, horumarinnada aan degaanka aheyn, horumarinnada qoysaska badan, iyo mashaariicda ku teedsan xudduuda Aagga Koboca Magaalooyinka sida ku cad heshiisyada qorsheynta wadajirka ah ee hore beddelkii xadka 1994 ee asalka ah. Haddii isbeddelo uu ku taliyo GMPC, Qorshaha Ballaaran iyo Xeerka Degmada King ayaa sidoo kale u baahan doonna in si habboon wax looga beddelo. Baaxadda isbeddelladan waxaa la go'aamin doonnaa marka GMPC ay dhammeyso dib-u-eegisteeda. *Si aad u akhriso xeernidaamyada Afar-ilaa-Hal ee jira: Eeg Siyaasadaha Qorsheynta Degmada oo Dhan[20] Cutubka Qaababaka Horumarinta, Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 3aad Degaamada Miyiga ah iyo Dhulka Kheyraadka Dabiiciga ah, iyo K.C.C. Cutubka 20.18*

2. Cusbooneysii xeernidaamyada barnaamijka **Xuquuqaha Wareejinta Horumarinta (TDR)**. Oggolow meel bannaan oo furan oo la helay iyada oo la adeegsanayo maalgelinta canshuurta mustaqbalka ee ilaalinta si ay u noqoto goobaha dirista TDR. Caddee shuruudaha daraasadda ee loogu talagalay saameynta iyada oo la adeegsanayo TDR si loo kordhiyo cufnaanta aasaaska qayb-hoosaadyada rasmiga ah. Dhiirrigeli ilaalinta cadadka xariiqa badda ee bannaan oo aan lahayn dhismaha xasallinta ee adag iyada oo la bixinayo barta direysa gunnada ee TDRs. Dhiirrigeli ilaalinta dhulka keymaha iyada oo la hagaajinayo wareejinta saamiyada xuquuqaha horumarinta ee loogu talagalay guryaha soonaha-F. Ka saar ka-reebista loogu talagalay xisaabinta samaeynta qiiqa ka soo baxaya guriga dhirta lagu beero (greenhouse) ee kororka cufafka ka dhalanaya gaabaha helaya TDR ee magaalada. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 3aad Degaamada Miyiga ah iyo Dhulalka Kheyraadka Dabiiciga ah iyo Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubka 21A.37 Cutubka 21A.37*

[20] Siyaasadaha Qorsheynta Degmada oo Dhan [LINK]

Cusboonaysiinta Guud

A. Baaxadda Mowduuca Shaqada: Hirgeli isbeddelada meel-la-xiriira ee aan la sharciyeyn ee Siyaasadaha Qorsheynta ee Degmada oo Dhan.

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. Qaado **bartilmaameedyada koboca shaqooyinka iyo guryeynta** ee loogu talagalay Degmada King ee aan la xudduudeyn, sida lagu caddeeyay Siyaasadaha Qorsheynta Degmada oo Dhan. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 2aad Bulshooyinka Magaalooyinka*

2. Ogolow Degmada in ay ka codsato GMPC in **Xarumaha Waxqabadka Aan La Sharciyeyn ee Skyway iyo White Center** in ay noqdaan xarumo degmada oo dhan ah. Magacaabistaasi waxay u oggolaan doontaa in la siiyo mudnaanta maalgelinnada kaabayaasha dheeraadka ah. HIMILADA 2050 ee Golaha Degaanka Puget Sound (PSRC)[21] ayaa dhigaya in maaliyadaha uu maareeyo golaha PSRC in lagu hagaajin doonno xarumaha cayiman ee degaanka iyo degmada oo dhan. Siyaasadaha Qorsheynta Degmada oo dhan waxay hadda u aqoonsanayaan Xarumaha Waxqabadka Aan Sharciyeysnayn ee Skyway iyo White Center in ay yihiin xarumo musharrax ah. Tallaabadan waxay Degmada u oggolaaneysaa in ay bilaabaan hannaan lagu sharciyeynayo magacaabistooda. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 2aad Bulshooyinka Magaalooyinka iyo Wax-ka-beddellada sharciga*

3. Sannadka 2022, Laanta Sharcidejinta Gobolka Washington ayaa meelmariyey SB 5593,[22] taas oo oggolaaneysa, laakiinse aysan u baahnayn, degmooyinka in ay adeegsadaan **Isdhaafsiyada Aagga Koboca Magaalooyinka** marka xaalado gaar ah laga soo baxo. Sharciga gobolka wuxuu oggolaan doonnaa dhulalka hadda ku jira Aagga Koboca Magaalada in laga saaro iyada oo lagu beddelayo dhulalka miyiga ee lagu darey Aagga Koboca Magaalada ee meelaha cadaadiska saaraya qaababka horumarinta ee dhaafsiisan dhulalka magaalada la horumarin karo, ee la heli karo. Siyaasadaha Qorsheynta Degmada oo dhan ayaa loo baahan doonnaa in wax laga beddelo si gunnadan loogu adeegsado Degmada King. GMPC ayaa hadda qiimeynaysa haddii ay ku talineyso oggolaanshaha

[21] Hay'adda siyaasad dejinta degmooyinka badan ee loogu talagalay degmooyinka King, Pierce, Snohomish iyo Kitsap; [LINK]. PSRC ayaa la-soconaysa siyaasadaha qorsheynta degmooyinka badan ee HIMILADA 2050. [LINK]
[22] Hindiso-Sharciyeedka Aqalka Sare ee Beddelka ah 5593 ee La Dhammeystiray [LINK]

isku-beddeladaasi. Haddii lagu taliyo, Qorshaha Ballaaran iyo Xeerka Degmada King ayaa sidoo kale u baahan doonna in si habboon wax looga beddelo. Isbeddelladaasi waxaa la go'aamin doonnaa marka GMPC ay dhammeyso dib-u-eegisteeda. *Si aad u akhriso xeer-hoosaadyada gobolka ee jira: Eeg SB 5593*

4. Taageer isuduwidda lala yeelanayo **magaalooyinka ku dheggan Degaanka Miyiga ah iyo Dhulalka Kheyraadka Dabiiciga ah** si loo hubiyo in hannaanka dib-u-eegista horumarinta ee horumarinnada isticmaalka-iskudhafka ah ee weyn ee magaalada in uu khafiifinayo saameyn goobaha aan la xudduudeyn, sida ka hortagga gaadiidka sii kordhey, joogteynta sifada miyiga, iyo ilaalinta goobaha deegaan ahaan xasaasiga ah. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 1aad Qorsheynta Maareynta Koboca Gobolka*

B. Baaxadda Mowduuca Shaqada: Hirgeli Barnaamijka Qorsheynta Degaan-hoosaadka.

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. Sida qayb ka mid ah Cusboonaysiinta 2024, Degmadu waxay diyaarineysaa oo ay qaadan doontaa **Qorshaha Degaan-hoosaadka Degaanka Adeegga Bulshada ee Dooxada Snoqualmie/Waqooyiga-bari ee Degmada King**, iyo sidoo kale hirgelinta isticmaalka dhulka iyo isbeddellada soonayaasha iyo xeernidaamyada horumarinta. Qorshahan degaan-hoosaadka ayaa lagu dabakhi doonnaa Degaanka Adeegga Bulshada oo dhan wuxuunna beddeli doonaa Qorshaha Degaan-hoosaadka Magaalada Fall ee hadda. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan soo-jeedimadaasi iyo habab dheeraad ah oo ku saabsan sida loo bixiyo ra'yi iyaga ku saabsan ayaa waxaa laga heli karaa https://publicinput.com/SnoValleyNEKC. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 11aad Qorshaynta Degaan-hoosaadka Degaanka Adeegga Bulshada, Qorshaha Degaan-hoosaadka Snoqualmie Valley/Northeast King County, Wax-ka-beddellada sharciga ah ee K.C.C. 20.12.329 iyo Cutubka 21A.38, iyo Isticmaalka Dhulka iyo Wax-ka-beddellada Khariidadda Soonayaasha*

2. Sida uu u baahan yahay Qorshaha Degaan-hoosaadka Aagga Adeegga Bulshada Jasiiradda Vashon-Maury, cusbooneysii**xaaladaha soonayaasha gaarka u ah guriga ee Jasiiradda Vashon-Maury**.[23] Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan soo-jeedimadaasi ayaa waxaa laga heli karaa https://publicinput.com/vashonsubarea. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubka 21A.38, Isticmaalka Dhulka iyo Wax-ka-beddellada Khariidada Soonayaasha, iyo Warbixinta Vashon P-Suffix iyo Warbixinta Dulmarka Gaarka ah ee Degmada ee Guryeynta La Awoodi Karo ee Vashon*

3. U baaho in diyaarinta **Liiska Baahiyada Bulshada**[24] ay ka dhacdo wada-shaqeynta heerka "degmada iyo bulshada oo wada-shaqeeya" sida lagu muujiyey Hagaha Wada-shaqeynta Bulshada ee Xafiiska Sinnaanta iyo Cadaaladda Bulshada (OESJ).[25] Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: *Eeg Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubka 2.16*

4. Cusbooneysii **jadwalka qorsheynta degaan-hoosaadka** si looga tarjumo isbeddelka dhowaan ku yimid sharciga gobolka oo gelinaya qorsheynta ballaaran meerto cusbooneysiin 10-sano ah. Cusboonaysiinta waxay xaqiijin doontaa in uu hakad galo qorsheynta degaan-hoosaadka si loo taageero horumarinta cusbooneysiinta dhexe iyo Qorsheynta Ballaaran ee 10-sano. Isbeddellada ayaa sidoo kale cadeeya jadwalka ka warbixinta ee loogu talagalay **tallaabooyinka waxqabadka qorsheynta degaan-hoosaadka** si loo hubiyo in ka-warbixinta u dhaxeysa dhammaan qorsheyaasha degaan-hoosaadka in ay isla-jaanqaadayaan. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud:* Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 11aad Qorshaynta Degaan-hoosaadka

[23] Qorshaha Degaan-hoosaadka ee Degaanka Adeeegga Bulshada Jasiiradda Vashon-Maury, Qorshe-hawleedka VMI CSA Tallaabada 1 [LINK]
[24] Liisaska Baahiyada Bulshada waxay dad ka caawinayaan hirgelinta qorsheyaasha degaan-hoosaadka iyo aqoonsiga tallaabooyinka gaarka ah sida barnaamijyada, adeegyada, ama horumarinnada waaweyn ee wax-ka-qabta baahiyada ay aqoonsatey-bushada. [LINK]
[25] Hagaha Wada-shaqeynta Bulshada ee Degmada King [LINK]

Degaanka Adeegga Bulshada iyo Wax-ka-beddellada sharciga ee Xeerka Degmada King (K.C.C.) *Cutubka 2.16*

C. Baaxadda Mowduuca Shaqada: Cusboonaysii siyaasadaha gaadiidka. Wax-ka-beddellada lagu sameynayo siyaasadaha la xiriira gaadiidka ee looga baraandegay cusboonaysiinta KCCP 2024 waa kuwa ka tarjumaya cusboonaysiinta horey loo qaatey ee lagu sameeyay siyaasadaha gaadiidka Degmada, oo uu ku jiro qayb ka mid ah Sharciga 19367.[26]

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. Taageer adeegyada iyo xarumaha gaadiidka ee **si loo siman yahay u bixiya adeegyada dhaqdhaqaaqa** ee loo fidiyo bulshooyinka qaba baahida ugu badan sida lagu xusay qaybta Sinnaan U-hiilinta ee kore. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 8aad*

2. Taageer maalgelinnada sii wanaajiya **fursadaha ammaanka ah, loo siman yahay, lana heli karo ee loogu talagalay adeegyada gaadiidka dadweynaha**, dadka lugeynaya, baaskiileyda, baabuurta iyo gawaarida qafilan, iyo kuwa kale ee beddela gawaarida halka qof raaca – sida bixinta adeegyada gaadiidka xaddidan ama debecsan, boosteejooyinka basaska ammaan ah oo la gaari karo, jidadka hareermara wadooyinka, garbaha waddada, iyo jidadka baaskiilka. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 8aad*

3. Taageer **yoolka ammaanka gaadiidka ee aan lahayn dhimasho** iyo dhaawacyo halis ah iyada oo la kaashanayo hay'adaha kale, bixiyeyaasha adeegga xaaladda degdegga ah, iyo isticmaalayaasha waddooyinka si mudnaan loo siiyo in meesha laga saaro isku-dhacyada noocaan ah. Taageer caafimaadka iyo ammaanka iyada oo lagu dayo kaabayaasha **waddooyinka dhammeystiran** jaangooyada waddada ee Degmada. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 8aad*

D. Baaxadda Mowduuca Shaqada: Dib-u-eeg xeernidaamyada kheyraadka miyiga iyo kan dabiiciga ah.

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. Cusboonaysii siyaasadaha **Beeraha, Kalluunka, Daadka** si loo hubiyo in, marka la hirgelinayo mashaariicda yareynta halista daadka iyo sabada, in uu halkaasi ka jiro dhul dad ku filan gudaha Degmooyinka Waxsoosaarka Beeraha leh oo la heli karo si loo taageero suurtagalnimada/shaqeynta muddada dheer ee beeraha ganacsiga ah. Iyada oo la fulinayo waajibaadyada Xeerka Maareynta Koboca ee lagu ilaalinayo Degmooyinka Waxsoosaarka Beeraha leh ee loogu talagalay isticmaalada beeraha ganacsiga ah, cusboonaysiinta waxay aqoonsan tahay in 1) awoodda lagu horumarinayo soo kabashada kalluunka salmon ee degaamadan ay muhiim u tahay ixtiraamidda iyo joogteynta xuquuqaha ay leeyihiin Gobolka Washington iyo qabiillada hinddida ah sida wakiilada madax-bannaan ee kalluunka, duurjoogta, iyo kheyraadyada kale ee biyaha, iyo 2) dib u soo noolaynta hannaanada daadka iyo khafiifinta halisaha daadka waa lagama maarmaan si loo hubiyo caafimaadka aadanaha loona ilaaliyo ammaanka dadweynaha. Degmadu waxay sii wadi doontaa in ay taageerto Beerta Dooxada Snoqualmie, Kalluunka, Shaqada daadka, laakiinse kama abuuri doonto hannaano la mid ah Degmooyinka Kale ee Waxsoosaarka Beeraha leh. Taa beddelkeeda, Degmadu waxay si degdeg ah oo hufan uga hirgelin doontaa yoolalka Beerta, Kalluunka, Daadka dhammaan Degmooyinka Waxsoosaarka Beeraha leh iyada oo lagu saleynayo casharradii laga bartey shaqada Dooxada Snoqualmie. Cusboonaysiinta 2024 waxay ballanqaadeysaa Degmadu in ay adeegsato hannaan dib-u-eegis oo tixgelinaya xaaladda dhulka biyaha kala qaybiya ee loogu talagalay mashaariicda ay taabogelisay Waaxda Kheyraadka Dabiiciga ah ee Degmada King iyo Qaybta Kheyraadyada Dhulka, Biyaha, iyo Beeraha, ee Degmooyinka Waxsoosaarka Beeraha halkaasi oo mashruuca dib u soo nooleynta sabada ama dhulka daadadka ku soo rogma uu keeni karo hoos u dhaca qaddarka dhulka ee beeraha loo heli karo; hannaanka wuxuu aqoonsan doonnaa

[26] Sharciga Dowladda Hoose ee 19367 [LINK]

siyaabaha la isugu dheellitirayo yoolalka waxsoosaarka beeraha, tayada sabada, iyo dhulka daadadka ku soo rogma iyo shaqooyinka ikoloji ee mashaariicda gaarka ah. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubka 3aad Degaamada Miyiga ah iyo Dhulalka Kheyraadka Dabiiciga ah*

2. Wax-ka-beddel xeernimaadyada si aad u caddeyso **halkan loo oggol yahay in laga sameeyo meelo loo soo dalxiis tago oo Degaanka Miyiga ah**, waafaqsan siyaasadaha Degmada ee taageera ilaalinta Degaanka Miyiga ah iyo Dhulalka Kheyraadka Dabiiciga ah, iyo in la qiro xaddidaadaha kaabayaasha ee degaamadaasi. Xeerka hadda wuxuu u baahan yahay meelaha loo soo dalxiis tago in ay ku jiheysnaadaan madadaalada kheyraadka ku saleysan ee dibedda. Isbeddellada waxay soo-jeedinayaan caddeynta iyo xoojinta shuruudaasi, iyada oo aan la oggolaaneyn isticmaalka soonaha (Seeraha Magaalooyinka), loo baahanayo kulan bulsho ka hor inta aan ruqsado la codsan, iyo sameynta shuruudaha dib u sikinta dhulalka dariska la ah ama ku xiga. Isbeddellada waxay sidoo kale dejinayaan xaaladaha gundhiga miyiga ee cusub ee u dhow waxqabadyada madadaallada kheyraadka ku saleysan ee dibedda ee u dhow, shuruudaha cusub ee degaanka miyiga ee loogu talagalay bixinta waxqabadyada madadaallada kheyraadka ku saleysan dibedda ee goobta, iyo tixgelinno dheeraad ah marka goobaha dalxiiska loo tago la soo jeediyay in laga hirgeliyo dhulalka keymaha ah. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. 21A.08.040*

3. Iyadoo laga jawaabayo codsiga Gal-dacweedka 2022,[27] xaddid saameynta isticmaalada **agabka ka baraandegidda**, iyadoo la caddeynayo in iibka tafaariiqda agabka goobta oo keliya loo oggol yahay marka uu jiro fasaxa isticmaalkiisa shuruud ku xiran; sida isticmaalka dheeraadka ah ee macdanta, keliya oggolow ka baraandegidda goobta lagu sameeyo iyo/ama agabka u dhow (goobta u jira saddex mayl gudahooda); iyo shuruudaha dheeraadka ah ee goobaha degaanka miyiga ah, oo ay ku jiraan xaddidaadaha keydka (ilaa 3,000 waar(yard) saddex jibbaaran), hubinta shuruudaha u hoggaansamidda xeerka (qurxinta muuqaal dhuleedka, jaangooyada isticmaalka dhulka aan degaanka ahayn, iyo ruqsadaha simista dhulka kala sarreeya), iyo u baahashada in agabkaasi ugu horreyn laga helo dhulalka kheyraadka iyo miyia si loo xaqiijiyo in ay tahay isticmaal miyi-ku-tiirsan. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. 21A.08.080*

4. Iyadoo laga jawaabayo codsiga Gal-dacweedka 2022[28,29] iyo si aad gacan uga geysato saameynta **hawlgallada macdan qodista**, abuur shuruudo marxaladeyn xaddidaya inta ay le'eg tahay marxalad kasta. Goobaha 100 eykar ah ama ka yar, marxalad kasta waxaa lagu xaddidi doonnaa 25 eykar, iyo goobo kasta ee ka weyn 100 eykar, marxalad kasta waxaa lagu xaddidi doonnaa 50 eykar, iyo meelo kasta ee ka badan 25 erykar waxaa looga baahan doonnaa in ay laba jeer yeeshaan dib u dhacyo ka badan inta si kale loogu baahan lahaa. Iyada oo aan la eegayn inta ay goobtu le'eg tahay, marxalad saddexaad lama awoodi doonno in la bilaabo ilaa iyo inta dib u soo celinta marxaladda koowaad si weyn loogu dhammeynayo. Isticmaalada, dhismeyaasha, iyo keydinta qalabka ama agabka ee aan sida tooska ah ula xiriirin isticmaalka macdan qodista, qorshaha dib u soo celinta, ama isticmaalka dheeraadka ah ayaa la mamnuuci doonnaa. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. 21A.22.060*

5. Diid **horumarinnada isticmaalka iskudhafka ah ee guryaha Degaanka Miyiga ah ee loo qoondeeyay Xafiisyada (O) iyo Ganacsiyada Xaafadda**, marka laga reebo Magaalooyinka Miyiga ah. Kala-sooca soonayaasha NB iyo O ayaa loo adeegsadaa dhulalka degaamada miyiga ah iyo kuwa magaalooyinka, iyo isticmaalo kala duwan ayaa loo oggol yahay gudaha soonayaashaasi, iyada oo diiradda la saarayo isticmaalada ganacsi. Si kastaba ha ahaatee, gurhaha qoysaska badan ku nool (abaarmanka, guryaha laba ilaa saddexda dabaq ah, iyo guryaha koox ahaanta loo wada

[27] Warbixinta Gal-dacweedka 2022 – Codsiga lambar 8 [LINK]
[28] Gal-dacweedka waa fursad dadweynaha ay ku codsanayaan isbeddellada lagu sameynayo Qorshaha Ballaaran, asteynta isticmaalka dhulka iyo kala-soocidda soonayaasha, iyo xeernidaamyada horumarinta. [LINK] Laanta fulinta ayaa sidoo kale adeegsatey "gal-dacweed-yar" intii lagu guda jirey qiimeynta Cusbooneysiinta 2024, taas oo ahayd fursad dheeraad ah oo loogu talagalay dadweynaha in ay u soo gudbiyaan isbeddelada hab ka dhaqsiyaha badan hannaanka Gal-dacweedka dhammeystiran.
[29] Warbixinta Gal-dacweedka 2022 Docket – Codsiga lambar 9 [LINK]

dego) ayaa sidoo kale la oggol yahay haddii ay qayb ka yihiin horumarinta isticmaalka-iskudhafka ah. Cufnaanta degaanka ee loo oggol yahay horumarinnadan ayaa hadda u dhaxeeya siddeed ilaa 96 guri eykar kasta, iyada oo aan la eegayn haddii dhulka guriga laga dhisayo uu ku yaalo degaan miyi ama magaalo ah. Sida ay tilmaamayaan Xeerka Maareynta Koboca iyo Qorshaha Ballaaran, kuwaaso waa heerarka horumarinta magaalada ee aan ku habboonayn Degaamada Miyiga ah, halka qaabka koboca guud iyo xadadka cufnaanta la sameeyay ay u dhaxeeyaa min hal guri 2.5 ilaa 10 eykar kasta (oo ku xiran kala-sooca soonaha miyiga ah ee ku habboon). *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubyada 21A.08 iyo 21A.12*

6. Diid **Horumarinnada Qorsheysan ee Magaalooyinka** (UPDs) ee cusub lagana hirgelinaya Degmada King ee aan la xudduudeyn. Ma jiraan UPDs hadda socda; UPDs yada horey loo sameeyay ayaa waxaa lagu darey magaalooyinka ama dib ayaa loo nakh-shadeeyay si loo waafajiyo xeernidaamyada horumarinta iyo aagagga Degmada King ee caadiga ah. Intaa waxaa dheer, in aanu jirin degaamo magaalo ah oo aan la sharciyeyn, la horumarin oo weyn kuwaas oo ku habboon UPD-yada mustaqbalka. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 2aad Bulshooyinka Magaalooyinka iyo Wax-ka-beddellada sharciga ee guud ahaan K.C.C.*

E. Baaxadda Mowduuca Shaqada: Horumari codsiyada wax-ka-beddelka Gal-dacweedka (Docket) dadweynaha, halka ku habboon.[30]

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. **Vashon Grange:** Qaybta dhulka 8887000660 iyo aagga agagaarkiisa ah. Codsiga Gal-dacweedka (Docket) 2022[31] ayaa soojeediyey isbeddelada qoondeynta iyo kala-soocidda soonayaasha suuragal ah si loo oggolaado dukaamada raashiinta tafaariiqda ah iibiya in laga sameeyo hoolka taariikhiga ah ee Grange Hall ee u dhow meesha ay ka soo degaan ama ka dhoofaan rakaabka doonta ee waqooyi. Isbeddelkaasi wuxuu u baahan doonnaa abuurista Xarunta Ganacsiga Xaafadda Miyiga ah (RNCC) oo cusub, taas oo uusan oggolayn Qorshaha Ballaaran. Beddelidda Qorshaha si loo oggolaado RNCCs cusub ayaa saameyn ballaaran ku yeellan doonta Degaanka Miyiga ah oo dhan, taas oo aan waafaqsaneyn awaamiirta Xeerka Maareynta Koboca iyo Qorshaha ee Degaanka Miyiga ah. In kasta oo uu RNCC ka jiro agagaarka, ballaarinta si loogu daro qaybtan dhulka ah ayaa sidoo kale u baahan doonta in lagu daro dhowr faragelin qaybaha dhulka degaanka miyiga ah, taas oo dhiirrigelin doonta horumarin ganacsi oo ah baaxad aan ku habboonayn degaankan iyo sameynta xeer liita oo jidooba oo loogu talagalay RNCC-yada kale. Taa beddelkeeda, waa in la taageeraa fikradda oggolaanshaha dib-u-adeegsiga hal-abuurka leh iyo ilaalinta la xiriirta Hoolka Grange ee degaanka aan la xuduuddeyn ee sida kale loo adeegsan qaab loogu adeegayo bulshada degaanka, beddelka koodhka soonaha ayaa lagu taliyey kaas oo oggolaan doonna dukaamo raashiin in laga sameeyo soonaha RA (Degaanka Miyiga ah) ee ka baxsan RNCC, haddii dukaanku uu ku yaalo gudaha Hoolka Grange ee taariikhi ahaan loo qoondeyay iyadoo gurigana uu ku yaalo meel u dhow RNCC jira. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubka 21A.08.070*

2. **Xabaasha Xayawaannada Rabaayadda ah ee Kent:** Qaybta dhulka 1522049162 iyo aagga agagaarkiisa ah. Codsiga "Gal-dacweedka yar" ee Cusbooneysiinta 2024 ayaa soo-jeediyey qiimeynta qoondeymaha isticmaalka dhulka iyo kala-soocyada qay ee la xiriira xabaasha taariikhiga ah ee xayawaannada rabaayadda ah ee agagaarkaasi ku taalla. Si loo suurageliyo in qabuur ahaan loo isticmaalo Dhulka lambarkiisu yahay 1522049162 oo ugu shaqeeyso sifo sharci ah, waxaa lagu taliyey in dhulka wax laga beddelo oo ayna u yeelato "ul" (Degaan Maagalo ah, Hoose) qoondeynta isticmaalka dhulka iyo kala-sooca soonayaasha R-1 (Degaan Magaalo ah, 1 guri eykar kasta). *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada Khariidadda*

[30] Ogow in codsiyada Gal-dacweedka (Docket) lagu qorey qaybaha kale ee soo koobistan marka codsigu uu si toos ah ula xiriiro baaxadda mowduuca la oggolaadey.
[31] Warbixinta Gal-dacweedka 2022 Docket - Codsiga lambar 8 [LINK]

Soonayaasha iyo Daraasadda Isticmaalka Dhulka iyo Soonayaasha Degaanka Qabuuraha ee Kent Pet

F. Baaxadda Mowduuca Shaqada: Daraasadaha Isticmaalka Dhulka iyo Qaybinta Aagagga.

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. **Warshadaha Dooxada Maple:** Cadadka dhulka ee 1622069091, 1522069034, iyo 1522069036 iyo degaanka ku wareegsan. Baaxadda Shaqada ayaa tilmaantey dib-u-eegista isticmaalka dhulka iyo kala-sooca aaggaga guryaha. Cadadka dhulka waxay hadda ku yaallaan Aagga Koboca Magaalada iyo aagga Warshadaha iyada oo jirto shuruudda horumarka gaarka ku ah dhulka oo ku xaddideysa isticmaallada goobta kuwa aan u baahnayn rukhsadda isticmaalka shuruudda ku xiran. Arrintan ayaa lagu qiimeeyay Qorshaha Ballaaran ee 2016.[32] Si kastaba ha ahaatee, wax isbeddelo ah laguma talin sababta oo ah falanqeyn dheeraad ah ayaa loo baahnaa. Falanqeyn dheeraad ah oo loo sameeyay sida qayb ka mid ah Cusbooneysiinta 2024 ayaa lagu soo gunaanadey in xaaladaha goobta iyo halka dhulalku ay ku yaallaan in ay ka dhigayaan kuwa aan ku habboonayn horumarinta magaalooyinka ama warshadaha. Sidaa daraadeed, waxaa lagu taliyey in cadadka dhulka laga saaro Degaanka Koboca Magaalada ka-dibna loo wareejiyo RA-5 (Degaan Miyi ah, oo hal guri laga dhisayo shan eykar kasta), oo aan lahayn shuruudo horumarineed. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada Khariidadda Soonayaasha iyo Daraasadda Isticmaalka Dhulka iyo Soonayaasha Degaanka Warshadaha ee Dooxada Maple*

2. **Isgoyska Snoqualmie:** Baaxadda Shaqada ayaa fartey dib-u-eegis lagu sameynayo dhulalka waqooyiga isgoyska I-90 iyo Waddada Gobolka ee 18 si loo eego in ay suuragal tahay in lagu darro Aagga Koboca Magaalada. Dhulalka kama soo baxaan shuruudaha hadda ku qoran Siyaasadda Qorsheynta Degmada oo Dhan DP-17 ee loogu talagalay kuddaridda Aagga Koboca Magaalada: 1) falanqeynta degmada oo dhan iyo go'aaminta in cabbirta Aagga Koboca Magaalada uu ku filan yahay in uu kaafiyo bartilmaameedyada koboca, 2) dhulka kuma dheganna xudduudda Aagga Koboca Magaalada 1994 ee asalka ah, iyo 3) dhulka ma ahan beerta Degmada King oo loo wareejinayo magaalada si beer waarta ahaan loogu adeegsado ama beer ay magaaladu lahayd tan iyo 1994. Intaa waxaa dheer, falanqeyntan in ay ku xiran tahay soojeedimada ay tixgelinayso GMPC, sida kor lagu xusay, si 1) wax looga beddelo barnaamijka Afar-ilaa-Hal iyo/ama 2) loo abuuro barnaamijka isdhaafsiga Aagga Koboca Magaalada. Soojeedin ku saabsan in lagu darro dhulalka Aagga Koboca Magaalada ayaa la go'aamin doonnaa marka shaqada GMPC ay dhammaato. Haddii isticmaal dhuleed kasta, qaybinta aaggaga, ama isbeddellada sharciga laga yaabo in la dammaanadqaado si loo taageero mid kasta oo ka mid ah natiijooyinka loo baahan yahay haddii dhulka ay tahay in uu ka sii mid ahaado Aagga Miyiga ah ayaa sidoo kale la qiimeynayaa. Falanqeyntan waa joogto, isbeddellada la soo-jeediyay lama awoodo in lagu darro Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud. Haseyeeshee, Degmadu waxay soo dhaweynaysaa ra'yiga ku saabsan isbeddellada suuragalka ah si loogu saleeyo waxa lagu dari doonno Qorshaha Lagu Taliyay ee Kooban.

3. **Saldhiga Dab-damista ee Black Diamond:** Qaybta dhulka 0421069092 iyo aagga agagaarkiisa ah. Baaxadda Shaqada ayaa fartey dib-u-eegista haddii qaybta dhulka lagu darayo Aagga Koboca Magaalada ama la oggolaanayo adeegga bulaacadaha ee soo gala guriga haddii uu miyi sii ahaado. Qaybta dhulka kama soo baxdo shuruudaha hadda ee loogu talagalay in guri lagu daro Aagga Koboca Magaalada, sida loogu baahan yahay Siyaasadda Qorsheynta Degmada oo Dhan DP-17, 1) falanqeynta degmada oo dhan iyo go'aminta in cabbirka Aagga Koboca Magaalada uu ku filan yahay kaafinta bartilmaameedyada koboca 2) guriga ama dhulka uusan ka soo bixin shuruudaha cabbirta lootada ugu yar ee loogu talagalay Barnaamijka Afar-ilaa-Hal oo aysanna ka soo bixin shuruudda in dhulka cusub ee magaalada ah in keliya loo isticmaalo horumarin deegaan, iyo 3) dhulka ma ahan beerta Degmada King oo loo wareejinayo magaalada si beer waarta ahaan loogu adeegsado ama beer ay magaaladu lahayd tan iyo 1994. Xeerka Maareynta Koboca (RCW 36.70A.210(3)(b)) ma oggola adeegga bulaacada in laga sameeyo degaanka miyiga ah marka laga reebo xaalado xaddidan si loo ilaaliyo ammaanka iyo caafimaadka dadweynaha ee aasaasiga ah iyo deegaanka. Sida ay u baahan yihiin Siyaasadda Qorsheynta Degmada oo Dhan PF-13, siyaasadda Qorshaha

[32] Laanta Fulinta Waxay Ku Talisey Qorshaha Ballaaran 2016 ee Degmada King County – Daraasadda Soonaha Aagga #15 [LINK]

Ballaaran F-264, iyo Xeerka Degmada King 13.24.134, macluumaadka ayaa loo baahan doonnaa si loo bixiyo dokumentiyo 1) dhibaatooyinka gaarka ah ee ammaanka iyo caafimaadka ee nidaamka bulaacada hadda ee halis ku ah isticmaalka dhismaha(dhismeyaasha) jira, iyo 2) sida dayactirrada, ballaarinta, ama beddelka nidaamka bulaacada ama isticmaalka nidaamyada kale ee biyaha wasakhda ee goobta lagu adeegsado ay u yihiin kuwo aan suuragal ahayn. Macluumaadkaasi la'aantiisa, hadda ma jiro aasaas oggolaanaya bulaaco in laga hirgeliyo degaanka miyiga ah ama in guriga lagu daro Aagga Koboca Magaalada. Si kastaba ha ahaatee, Degmada ayaa shaqaaleyn doonta la-taliye sannadka 2023 si ay dib-u-eegis ugu sameyso xaaladda, baahiyada iyo awoodda qaadka nidaamka bulaacada. Falanqeyntaasi ayaa dib loo eegi doonnaa marka la dhammeeyo, waxaanna waqtigaasi la sameyn doonnaa soojeedin kama dambeys ah. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Daraasadda Isticmaalka Dhulka iyo Kala-qaybinta Soonayaasha ee Degaanka Saldhiga Dab-damista ee Black Diamond*

4. **Isdhaafsiga Aagga Koboca Magaalada Carnation:** Qaybta dhulka 2125079009, 2125079002, iyo aagga agagaarkiisa ah. Baaxadda Shaqada ayaa fartey dib-u-eegista iyo falanqeynta in qaybahan dhulka laga saaro Aagga Koboca Magaalada iyada oo la dhaafsanayo in lagu daro, dhul kale oo miyi ah Aagga Koboca Magaalada. Isbeddelka noocaasi ah wuxuu ku tiirsan yahay in GMPC ay ku taliso abuurista barnaamijka isdhaafsiga Aagga Koboca Magaalada sida kor lagu xusay. Iyada oo la tixgelinayo suuragalnimada abuurista barnaamijkaasi, Magaalada Carnation waxay muujisey dhulal miyi ah oo la dhaafsan karo dhulalka hadda magaalada ah. Si kastaba ha ahaatee, dhulalka miyiga ah kama soo baxaan shuruudaha isdhaafsiga Aagga Koboca Magaalada sababta oo ah 1) in ka badan boqolkiiba 15 ee dhulalka miyiga waxaa saameeyay degaamada muhiimka ah 2) Aagga Koboca Magaalada ee dib loogu noqdey wuxuu kordhin doonnaa cadaadiska magaaleynta sababta oo ah aagga magaalada cusub ayaa wuxuu saddex dhinac ugu hareeraysan doonnaa dhulalka miyiga ah ee harsan. Xitaa haddii ay dhacdo in GMPC aysan ku talin barnaamijkaasi isdhaafsiga in lagu isticmaalo Degmada King, dhulalka la aqoonsadey kama soo bixi doonnaan shuruudaha uu dhigaya sharciga gobolka. Sidaa daraadeed, ma jiraan isbeddello lagu talinayo in lagu sameeyo isticmaalka dhuleed ama qaybinta aaggaga dhulka. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Daraasadda Isticmaalka Dhulka iyo Kala-qaybinta Soonayaasha Degaanka Isdhaafsiga Aagga Koboca Magaalada Carnation*

G. Wax-ka-beddellada Khariidadda Soonayaasha iyo Isticmaalka Dhulka ee Dheeraadka ah

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. **Skyway-West Hill iyo North Highline Cannabis Retail P-Suffix:** Haddam waxaa jira shuruudo horumarineed oo gaar u ah guriga/hantida maguurtada ah (p-suffixes) taas oo xaddideysa tirada isticmaalka tafaariiqda xashiishka ee cusub kana jira Skyway iyo North Highline (WH-P11[33] iyo NH-P02[34]) ilaa labo. Si loo waafajiyo erey-bixinta xashiishka ee lagu muujiyey qaybta kore ee Sinnaanta-u-Hiiliya, luuqadda p-suffixes-kan ayaa sidoo kale isu-beddelaya "xashiish/cannabis." *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada Khariidadda Soonayaasha iyo Isticmaalka Dhulka*

2. **Sixitaannada Wax-ka-beddelka Khariidadda Qorshaha Ballaaran ee 2022** Cusbooneysiinta wax-ka-beddellada khariidadda la ansaxiyey ee Qorshaha Ballaaran ee 2022[35] ayaa si aan ula-kac ahayn uga reebay qaar ka mid ah dhulalka loogu talagalay qoondeynta isticmaalka dhulka iyo/ama isbeddellada kala-sooca soonayaasha. Wax-ka-beddelka khariiradda wuxuu saxayaa khaladaadkaasi si loo waafajiyo ujeeddada jirta. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada Khariidadda Soonayaasha iyo Isticmaalka Dhulka*

3. **Horumarinta Saameynta-Hooseysa leh iyo Mashruuca Bandhiga Cagaaran ee Dhisan**: Mashruucan soo bandhiga ee K.C.C. 21A.55.060 ayaa la ansaxiyey 2003 si loo taageero horumarinta saameynteeda hooseysa iyo hababka dhisidda dhismeyaasha ayaa u keenaya faa'iidooyin

[33] P-Suffix WH-P11 [LINK]
[34] P-Suffix NH-P02 [LINK]
[35] Sharciga Dowladda Hoose ee 19555 [LINK]

deegaanka iyo guryaha la awoodi karo ee North Highline, Vashon-Maury Island, iyo Renton horey loo xudduudeeyay (tan iyo markii lagu darey). Oggolaanshaha mashruuca ayaa tan iyo markaasi dhacey. Wax-ka-beddelkan khariidadda soonayaasha ayaa soo-jeedinaya in meesha laga saaro dulsaarka mashruuca bandhiga ee guryaha ku habboon. Waxaa jira isbeddelka la soo jeediyay oo la xiriira kuna jira sharciga loogu talagalay cusbooneysiinta 2024 kaas oo burinaya mashruuca soo bandhiga ee la xiriira ee laga soo qaatey xeerka. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada Khariidadda Soonayaasha iyo Isticmaalka Dhulka iyo Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubka 21A.55*

4. **Mashruuca Soo-bandhiga Mashruucyada Guryeynta iyo Bulshooyinka La Joogteyn Karo**: Mashruucan soo bandhiga ee K.C.C. 21A.55.101 ayaa la ansaxiyey 2009 si loo taageero horumarinta guryeynta la awoodi karo ee guryaha dheeraadka ah ee Degmada Qaarkood ee ku yaalla saddex meelood oo ka mid ah Skyway-West Hill (Tuulada Brook), North Highline (White Center Workshop), iyo bariga Waddada Federaalka (Kit's Corner). Si kastaba ha ahaatee, ma jirin wax-ka-beddelka khariidadda soonayaasha oo rasmi ah waqtigii lagu soo rogey mashruuca soo bandhiga kala-qaybqaybinta soonayaasha dhulalka. Wax-ka-beddelkan khariidadda wuxuu sixi doonnaa khaladka farsamo ee 2009 wuxuunna dulsaar ku soo rogi doonnaa guryaha u-qalma ee ku yaalla Skyway-West Hill (Brook's Village), North Highline (White Center Workshop). Sidoo kale, falanqeynta 2020 ee qiimeynaya dib-u-adeegsiga gaarka ah ee suuragalka ah ee dhulalka Degmada King ee dheeraadla ah ee loogu talagalay in loo isticmaalo guryeyn la awoodi karo ayaa go'aamisey in dhulalka geeska Kit (Kit's corner) ee ku yaalla bariga Waddada Federaalka (east Federal Way) ma ahayn goob ku habboon isticmaalkaasi. Sidaa daraadeed, guryaha Kit's Corner ayaa waxaa la soo jeediyay in laga saaro xeerka xaq-u-yeelashada mashruuca soo bandhiga; isbeddelkan dambe looguma baahna in wax-ka-beddel khariiradeed la sameeyo sababta oo ah dulsaarka soonayaasha marnaba laguma soo rogin guryahaasi si loo bilaabo. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada Khariidadda Soonayaasha iyo Isticmaalka Dhulka iyo Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubka 21A.55*

5. **Nidaamka Goobaha Bannaan ee Degmada King iyo Beeraha Kale/Dhulalka cidlada ah:** Degmadu waxay qiimeynaysaa qoondeymaha isticmaalka dhulka ee guryaha aan ka midka ahayn kuwaas oo ay hadda iska leeyihiin Degmada ama gobolka iyaga oo ah dhulal bannaan ama beero. Falanqeynta waa dib-u-eegista haddii lagu adeegsanayo qoondeynta adeegsiga dhulka "os" (Sistem-ka Dhulka Bannaan ee Degmada King) iyo "op" (Beeraha Kale/Cidlada ah) guryaha ku habboon si looga tarjumo isticmaalka looga gol leeyahay ee dhulka beero ama dhulal bannaan ahaan. Qoondeymaha isticmaalka dhulka ee "os" iyo "op" waxay oggolaanaaan isticmaalka kala-soocid kasta ee kala-qaybqaybinta soonayaasha ee gudahooda ah; sidaa daraadeed, isbeddel kasta ee magacaabista isticmaalka dhulka oo noocaas ah kasta si la taaban karo uma saameynayso kala-qaybqaybinta soonayaasha guryahay ee la oggol yahay, ama isticmaallada la oggol yahay ee la xiriira ama horumarinta dhulka. Qiimeyntan waa joogto; sidaa daraadeed, isbeddellada la soo-jeediyay lama awoodo in lagu darro Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud. Haseyeeshee, Degmadu waxay soo dhaweynaysaa ra'yiga ku saabsan isbeddellada suuragalka ah si loogu saleeyo waxa lagu dari doonno Qorshaha Lagu Taliyay ee Kooban. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada Khariidadda Soonayaasha iyo Isticmaalka Dhulka*

6. **Dooxada Snoqualmie/Waqooyiga-Bari ee Degmada King iyo Jasiiradda Vashon-Maury:** Qoondeynta isticmaalka dhulka ee kala duwan iyo kala-soocidda soonayaasha ayaa waxaa loo soo-jeediyey labadan bulsho. Ka eeg faahfaahin dheeri ah qayb-hoosaadda B. "Hirgeli Barnaamijka Qorsheynta Degaan-hoosaadka" ee Qaybta guud ee kore. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubka 21A.38, Isticmaalka Dhulka iyo Wax-ka-beddellada Khariidada Soonayaasha, iyo Warbixinta Vashon P-Suffix iyo Warbixinta Dulmarka Gaarka ah ee Degmada ee Guryeynta La Awoodi Karo ee Vashon*

G. Isbeddellada Guud ee Dheeraadka ah

Soo-jeedimada Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud oo Kooban

1. Abuur qodobka tallaabada qorshe hawleed si loo qeexo **Tallaabooyinka Waxqabadka Qorshaha Ballaaran** ee lagu ansaxiyay Mooshinka Motion 15014[36] si loo taageero sawirka aadka u cad ee waxqabadka qorshaha. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 12aad Hirgelinta, Wax-ka-beddelyada iyo Qiimeynta*

2. Ka wareeji **jadwalka cusbooneysiinta qorsheynta ballaaran** wareeg 8-sano ah ilaa wareeg 10-sano ah si loogu muujiyo isbeddellada dhowaan dhace sharciga gobolka. Jadwalka qorsheynta ee cusbooneysiinta 10-sanno ka-dibba marka la sameeyo ayaa sidoo kale la beddelay si loo waqti dheeraad ah loogu abuuro Horumarinta kooban ee cusbooneysiinta qorshaha la soo-jeediyay si ay gacan uga geysato fududeynta wada-shaqeyn loo siman yahay oo dheeraad ah iyo dib-u-eegista deegaanka ee lagama maarmaanka ah. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg cusbooneysiinta guud ahaan cutubyada Qorshaha Ballaaran iyo wax-ka-beddelyada K.C.C. Cutubka 20.18*

3. Cusbooneysii **habka gal-dacweedka** ee loogu talagalay cusbooneysiinyada dhexe ama 10-sano si codsiyada gal-dacweedka loogu laabo habka cusbooneysiinta guud oo loo waafajiyo dhammaan faallooyinka guud ee la helay intii lagu guda jirey cusbooneysiinyada qorshaha weyn. *Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: Eeg Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubka 20.18*

4. Cusbooneysii **barnaamijka ka-qaybgalka dadweynaha ee qorsheynta ballaaran** si loola jaanqaado shuruudaha sharciga gobolka, oo looga tarjumo hab-dhaqanka hadda, oo caddeyn loo bixiyo. Tallaabo Qorsho Hawleed ayaa sidoo kale la soo-jeediyay si loo aqoonsado fursadaha lagu sii wanaajinayo qorsheynta ballaaran ee loo dhan yahay iyo ka-qaybgalka cusbooneysiinta qorshaha mustaqbalka.[37] Si aad uga akhriso Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Guud: *Eeg Wax-ka-beddellada sharciga ee K.C.C. Cutubka 20.18 iyo Qorshaha Ballaaran Cutubkiisa 12aad Hirgelinta, Wax-ka-beddelyada iyo Qiimeynta*

[36] Mooshinka 15014 [LINK]
[37] Qorshe Hawleed Qorshaha Ballaaran ayaa wuxuu aqoonsanayaa tallaabooyinka dheeraadka ah ee ay Degmadu qaadeyso ka-dib marka la ansaxiyo Qorshaha Ballaaran ee 2024 si: 1) loo sii hirgeliyo oo loo qeexoqorshaha iyo/ama 2) loo sii wado shaqada ku saabsan arrimaha yimid intii lagu guda jirey horumarinta qorshaha laakiinse ma jirin waqti ama kheyraadyo dad ku filan oo lagu dhammeynayo shaqada ansaxinta ka hor.